HERITAGE INSTITUTE

# Doorka Dhallinyaradu ku leeyihiin Nabadaynta Galmudug

## Caqabadaha, Fursadaha iyo Tallaabooyinka Mustaqbalka

Maarso 2025

# Tusmada


1 **Nuxurka Daraasadda**

2 **Natiijooyinka Daraasadda**

3 **Hordhac**

4 **Habraaca Daraasadda**

*Macluumaadka Kaqaybgalayaasha*

5 **Aragtiyaha Doorka Dhallinyaradu ku Leedahay Nabadaynta**

*Qorshe-hawleedka Dibuheshiista Qaranka iyo Ajandaha Dhallinyarada Soomaaliyeed*

*Qorshe-hawleedyada Goboleed iyo kuwa Qaaradeed*

*Qorshaha Caalamiga ah ee Nabadda iyo Amniga Dhalliyarada*

6 **Aragtiyaha ka soo Baxay Doodihii Waraysi-kooxeedyada**

***Iswaafajinta Qorshe-hawleeddada iyo Aragtiyaha Maxalliga ah***

*Al-Shabaab*

*Aragtiyada Dhallinyaradu ka Qabaan Khilaafaadka iyo Nabadaynta*

*Islaxisaabtanka iyo Caddaaladda Xilliga Kalaguurka: Codadka Dhuusamareeb*

*Saamaynta Qofeed ee Colaadaha Beeleed Ku Leeyihiin Dhallinyarada*

*Aragtiyaha Bulshadu ka Qabto Kaqaybgalka Dhallinyarada ee Nabadaynta*

*Caqabadaha Hortaagan Kaqaybgalka Dhallinyarada ee Nabadaynta*

*Iskaashiga Dhallinyarada Kala Dhexeeya Ururrada Nabadaynta*

7 **Gunaanad**

8 **Talabixinno**

# Doorka Dhallinyaradu ku leeyihiin Nabadaynta Galmudug:

## Caqabadaha, Fursadaha iyo Tallaabooyinka Mustaqbalka

**Maarso 2025**

**Xuquuqda daabacaaddan © 2025 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2025.**

# Nuxurka Daraasadda

Daraasaddani waxay diiradda saareysaa aragtida dhallinyaradu ka qabaan dibuheshiisiinta iyo nabadaynta Galmudug. Dal ay 80% shacabkiisu 35 sano da'ooda ka yaryihiin, aragtida dhallinyaradu waa lama huraan, gaar ahaanna arrimaha la xiriira nabadda, amniga iyo dibuheshiisiinta. Marka la eego deganaansho la'aanta dabadheeraatay ee Soomaaliya ka jirta, waxaa muhiim ah in la qiimeeyo aragtiyaha dhallinyarada oo marna ah cidda kowaad ee dhibbanaha u ah colaadaha, mararka qaarna loo adeegsado in ay ka qaybqaataan khilaafaadka, gaar ahaan Galmudug oo leh taariikh dheer oo isugu jirta xasilooni iyo xiisado colaadeed oo soo noqnoqda.  Ujeeddada kowaad ee daraasaddani waa in si qotadheer loogu kuurgalo aragtiyaha ay dhallinyarada Galmudug kaqabaan dibuheshiisiinta iyo nabadaynta. Si kastaba ha ahaatee, habdhaqannada bulsheed, gaar ahaanna kuwa ku salaysan nidaamka qabiilka, ayaa dhallinyarada liiday oo u arka kuwo aan u bislayn in ay si waxtar leh uga qaybqaataan hawlaha dibuheshiisiinta amaba in ay yihiin dhibbaneyaal aan door firfircoon qaadan karin.

Daraasaddan oo uu fuliyay Machadka Daraasadda Siyaasaadka ee Heritage oo adeegsanaya Barnaamijka Talo Wadaag II, ayaa xoogga saareysaa Dhuusamareeb oo ah magaalo taariikhi ah oo ay deggen yihiin beelo badan, kuwaas oo ay la soo darseen colaado tobbannaan sano soo taxnaa, oo ku salaysan cadaawad qabiil, kala duwanaansho fikir iyo muranno la xiriira khayraadka. Laga soo bilaabo sannadkii 2008 ilaa 2019, waxa ay Dhuusamareebi ku jirtay gacanta maamulka Ahlu Sunna Waljamaaca (ASWJ) oo ah urur suufiyo ah. Sida oo kale waxa gobolka ku xooggan dagaalyahannada al-Shabaab oo hore iyo haddaba jooga. Iyada oo doodo-kooxeedyo loo qabtay saddex kooxood oo ka kooban dhallinyaro isugu jirta wiilal iyo gabdho isudheellitiran (FGDs), waxa ay kaqaybgalayaashu tilmaameen in ay colaadaha qabiilka, saboolnimada iyo qoqobka siyaasaddu yihiin waxyaabaha sii huriya dagaallada Galmudug. Marka caqabadhaas laga yimaaddo, dhallinyaradu aadbay u danaynayaan in ay ka kaqaybgalaan dadaallada nabadaynta, iyada oo gaar ahaan loo marayo tabarro xirfadeed iyo fagaare-doodeedyo loo dhan yahay.

Dhanka kale, dagaalyahannada al-Shabaab ayaa iyaguna si xooggan u jooga maamul goboleedka. Haseyeeshee, in ka qaybgalayaashu ka labalabeeyaan in ay ku dhiirradaan in ay si cad oo furan uga hadlaan arrimaha al-Shabaab waxay hoosta ka xarriiqaysaa cabsida baahsan ee laga qabo aargoosiga kooxdaas, taas oo laga dareemayo sida ay bulshadu uga warwareegayso in ay toos u wajahaan saamaaynta taban ee kooxdan. Daraasaddan ku dhisan kaqaybgal-faleedka tooska ah ayaa hoosta ka xarriiqaysaa caqabadaha Galmudug ka haysta ka qaybgelinta dhallinyarada, iyada oo sida oo kale tilmaameysa fursadaha muhiimka ah ee jira si loo xoojiyo kaqaybgalka dhalinyarada ee nabadaynta.

Galmudug, oo ah mid ka mid ah dowlad goboleedyada ugu da'da yar dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, ayaa waajahday culaysyo aan la soo koobi karin oo dhanka dowlad-dhiska la xiriira, gaar ahaan marka la eego in ay dadaallada nabadaynta kaqaybgalaan dhallinyarada, haweenka iyo qaybaha bulshada ee la xaqiro. Daraasaddu waxay baadhitaan ku samaysay gaabisyadaas jira, waxayna soo jeedisay xalal ku habboon xaaladda gaarka ah ee la daraaseeyay, kuwaas oo sare u qaadi kara in dhallinyaradu ka qaybgasho geeddisocodka nabadda.

Caqabadaha ugu waaweyn ee ay cilmibaadhistu aqoonsatay waxaa ka mid ah xaddidnaanta helidda waxbarashada, degganaan la'aanta dhaqaale iyo hababka dhaqan-bulsheed oo si gaar ah hoos ugu dhiga haweenka. Taas beddelkeeda, daraasaddu waxay kaloo aqoonsatay arrimo rajo abuuraya sida jiritaanka ururro dhallinyaro oo maxalli ah, taageero qaran iyo mid caalami oo loo hayo hindiseyaasha dhallinyarada iyo suurtagalnimada u adeegsiga tiknoolojiyadda si meel sare loo gaarsiiyo codka dhallinyarada. Daraasaddu waxay dibumilicsi ku samaysay qorshe-hawleedyada heer qaran iyo kuwa heer caalami, sida Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaran ee Soomaaliya (National Reconciliation framework-NRF), Siyaasaadka Qaran ee Dhallinyarada (National Youth Policy-NYP) iyo sida oo kale istaratiijyadaha heer gobol iyo kuwa caalimiga ah ee ku saabsan in dhallinyaradu kaqaybgalaan dadaallada nabadaynta. Iswaafajinta aragtiyaha dhallinyarada Dhuusamareeb iyo ujeeddooyinka ku qeexan qorshe-hawleedyada aan soo xusnay, ayaa muujinaya in samaynta hannaanno midaysan oo ku saabsan horumarinta dhallinyarada iyo nabadayntu yihiin kuwo la gaari karo.

Tusaale ahaan, Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaran ee Soomaaliya, oo la daahfuray bishii Abriil 2024, wuxuu hiigsanayaa in uu xal u helo tiiraanyada ka dhalata colaadaha dabadheeraaday, islamarkaana xoojiyo dadaallada dhabuheshiisiinta, iyada oo lala tacaalayo caqabadaha gaarka u ah dhallinyarada, sida shaqo la'aanta, nabadgelyo xumada iyo koobnaanta fursadaha waxbarashada; kuwaas oo ah tabashooyinka ay garabsocdaan himilooyinka ay ku taamayeen dhallinyaradu ee ay soo bandhigtay daraasaddu.

Waxay ka qaybgalayaashu carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay mudnaan siinta dhulalka miyiga ah, kuwaas oo ah meelaha gun-dhigga u ah khilaafaadka/colaadaha oo ay ka soo unkamaan. Waxay kaqaybgalayaashu ku baaqeen in la qabto barnaamijyo tababarro oo dhammaystiran, gaar ahaanna ay soo agaasimaan hay'adaha dowladdu sidaWasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiintu, si dhallinyarada loo siiyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah habsocod nabad-dhis oo wax ku ool ah.

Intaas waxa dheer, in ay kaqaybgalayaashu lama hurraan u arkeen in la helo taageero dhaqaale iyo mid siyaasadeed, si loo awood-siiyo dhallinyarada loona muujiyo ka go'aanshaha dowladda ee hirgelinta kaqaybgelinta dhallinyarada. Daraasaddu waxay soo jeedineysaa in la hirgeliyo barnaamijyo waxbarasho oo qorshaysan iyo tababarro xirfadeed si loogu qalabeeyo dhallinyarada xirfadaha lagama maarmaanka u ah nabad-dhis waxtar leh. Sidoo kale, waxay soo jeedineysaa in la sameeyo madallo si wadajir ah looga qaybgalo, sida goleyaasha la tallinta dhallinyarada oo ah heer qaran iyo heer dowlad goboleed labadaba, si loo fududeeyo doodo dhex mara dhallinyarada, dejiyayaasha-siyaasadda iyo hoggaaamiyeyaasha bulshada. Iyo sidoo kale sii xoojinta taageerada hindiseyaasha dhallinyaradu hormuudka u yihiin ee nabadaynta iyadoo loo marayo maalgelinta dadaallada tayo-dhiska ee muhiimka u ah arrimahan.

Taas waxa sii dheer, in la buuro barnaamijyo ay dhallinyaradu ka helaan fursado dhaqaale si hoos loogu dhigo ku biiritaankooda colaadaha, looguna jiheeyo dhanka doorarka wanaagsan ee arrimaha bulshada. Ololeyaasha wacyigelinta/dhiska dadweynaha ayaa iyagana lagu tilmaamay in ay lama hurraan u yihiin waxkabeddelka fikirka bulshadu ka qabto dhallinyarada ee u arka in ay yihiin dhibbaneyaal aan wax qabad lahayn loona rogo mid u arka in dhallinyaradu yihiin dirsaneyaal firfircoon oo isbeddel ku saabsan nabadaynta horseeda.

Iyadoo xal u raadineysa caqabadahaas qaabdhismeedka ku saabsan, daraasaddu waxay tooshka ku ifineysaa fursadaha suurtagelin kara in dhallinyarada Galmudug ay kaalin mug leh oo dibuqaabaayn ka qaataan hawlaha dibuheshiisiinta iyo nabadaynta . Haddaba marka laga hadlayo Galmudug, xaqiijinta diyaarinta dhallinyarada, awood-siintooda iyo ka qaybgelintooda ayaa horseedi doonta gaaridda nabad waarta iyo wadajir bulsho.

# Natiijooyinka Daraasadda

Natiijooyinka ka soo baxay cilmibaaristan ayaa si weyn u waafaqsan gaabisyada, caqabadaha iyo xalalka la soo jeediyay ee ku xusan dhigaallada hadda jira ee laga qoray nabadaynta, iyo sida oo kale shuruucda iyo siyaasadaha heer qaran iyo kuwa caalamka. Aragtiyaha dhallinyarada Galmudug, oo si gaar ah ugu nuuxnuuxsaday u dhammaanta hababka go'aan gaarista, kobcinta karaanka dhallinyarada, xoojinta dhaqaalaha, dhiirrigelinta hindiseyaasha maxalliga ah iyo waxtarka garsoorka ayaa waafaqsan baaqyadii ay soo jeediyeen daraasadihii hore iyo hageyaasha ay soo saareen wasaaradaha dhallinyarada iyo dibuheshiisiinta Soomaaliya. Iyada oo la weelaynayo baaqyada deegaanka, lagana jawaabayo caqabadaha, fursadaha iyo gaabisyada la tilmaamay, waxa ay daneeyayaasha kala duwan ee ay ka mid yihiin qaybaha dowladda, ganacsatada iyo bulshada rayidka ahi dejin karaan istaratiijiyado bartilmaameedsanaya awoodaynta dhallinyarada Galmudug iyo xoojinta amniga iyo xasiloonida bulshada.  Haddaba, todobada qodob ee ugu muhiimsan natiijooyinka daraasaddu waa kuwan soo socda:

- **Kaqaybqaadashada Go'aan Gaarista:** Waraysiyadani waxa ay si cad u muujiyeen muhiimadda ay leedahay in dhallinyaradu si muuqata oo firfircoon uga qaybqaataan fagaarayaasha go'aan gaarista ee la xiriira geeddi-socodyada nabadda. In madalo iyo fursado loo abuuro ururrada dhallinyarada ee hadda jira iyo kuwa soo baxayaba waxay sii dardargelineysaa xawaaraha dadaallada nabadda iyo dibuheshiisiinta. Maadaama tirada ugu badan ee bulshadu tahay dhallinyaro- oo ay colaaduhu inta badan  saameeyaan dhallinyarada ha noqoto kuwa dhibta gaysta ama kuwa loo gaysto'e , waxaa lagama maarmaan ah in dhallinyarada loo aqoonsado in ay yihiin daneeyayaal iyo doorqaatayaal muhiim ah, balse aaney ahayn daawadeyaasha waxa socda.

- **Barnaamijyo Tababar oo Dhammaystiran:** Kaqaybgalayaashu waxa ay  ka midaysnaayeen baaqyada ku saabsan awoodaynta iyo kobcinta doorka dhallinyarada, kuwaas oo ka duulaya barnaamijyo tababar oo diiradda lagu saarayo xallinta khilaafaadka, dibuheshiisiinta iyo xirfadaha kale ee muhiimka u ah dhallinyarada. Barnaamijyada noocaas ahi waxa ay dhallinyarada u carbinayaan in ay door firfircoon ku yeeshaan ka qaybgalka hindiseyaasha nabadaynta. Sidoo kale, kaqaybgalka togan ee ay sameeyeen dhowr urur oo dhallinyaro oo hadda jira ayaa shaaca ka qaaday faa'iidooyinka laga filan karo awoodaynta dhallinyarada iyo xoojinta ka faa'iideysiga tamartooda iyo hal-abuurkooda, si loo kobciyo nabadda iyo dibuheshiisiinta bulshada dhexdeeda ah.

- **Fursadaha iyo Kaqaybgalka Hadda Jira:** Inkasta oo ay jiraan caqabado badani, haddana kaqaybgalayaashu waxa ay sheegeen in ay dhallinyarada horyaallaan fursado badan oo ay kaga qaybqaadan karaan dadaallada nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka. Tusaale ahaan, in ay jiraan shakhsiyaad wax soo bartay oo dib ugu soo laabtay deegaannadii ay ka soo jeedeen, oo ay weheliyaan ururro maxalli ah oo dhiirrigaliya in ay dhallinyaradu kaqaybqaataan dadaallada nabadaynta ayaa muujinaya in lagu tallaabsaday isbeddel weyn oo lagu garwaaqsanayo muhiimadda nabadda. Iyada oo isbeddelkaasi uu la jaanqaadayo siyaasadaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo hirgalinta habdhaqannada ugu wanaagsan heerarka caalamiga ah ee la xiriira in dhallinyarada laga  qaybgeliyo dadaallada nabadaynta iyo dibuheshiisiinta.

- **Mudnaansiinta Deegaannada Miyiga ah:** Kaqaybgalayaashu waxa ay carrabaabeen baahida loo qabo xoojinta dadaallada nabadaynta ee laga fulinayo dhulalka miyiga ah, halkaas oo ah meesha ay colaado badan oo dowlad goboleedka ka dhacaa ka soo unkamaan. Ka qaybgalayaasha waraysi-kooxeedyadu waxay shaaca ka qaadeen in ay lagama maarmaan tahay in si dhow loo la falgalo bulshooyinka reer miyiga ahi, si looga jawaabo baahiyohooda, isla markaana nabad wax ku ool ah loo gaaro. Haddaba, aragtidani waxay la jaanqaadeysaa falanqaymaha xeel-dheerayaasha oo muujinaya in ay bulshooyinka reer miyiga ahi inta badan la kulmaan khilaafaad/colaado isdabajoog ah, taas oo u baahan in la helo wax ka qabadyo si mug leh loo qorsheeyay.

- **Ururrada iyo Hindiseyaasha Dhallinyarada:** Kaqaybgalayaashu waxa ay hoosta ka xarriiqeen doorka togan ee ay ururrada dhallinyarada ee hadda shaqeeya ku leeyihiin doodaha nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka. Haddaba, sii xoojinta ururradaas iyo ka shaqaynta yagleelidda kuwo cusub ayaa lafdhabar u ah tallaabooyinka kor loogu qaadayo doorka dhallinyaradu ku leedahay geeddi-socodka nabadda.

- **Taageerada Dowladda iyo Hay'adaheeda:** Waxa carrabka lagu adkeeyay baahida loo qabo taageero xooggan oo ka timaada dowlad deegaanka iyo tan qaranka, si gaar ahna dhinacya agabka, maalgelinta iyo hagista iyo jihaynta barnaamijyada. Haddaba, kaqaybgalayaashu waxay soo jeediyeen in dowladdu, gaar ahaanna Wasaaradda Arrimaha Guduhu mudnaanta kowaad siiso dadaallada nabadaynta ee gudaha, ayna qaaddo tallaabooyin wax ku ool ah, si dhallinyarada looga qaybgeliyo shaqadaas.

- **Waxqabadka iyo Islaxisaabtanka Garsoorka:** Dabcan, nabadayntu kaligeed isma taagi karto haddii aan la helin islaxisaabtan iyo caddaalad. Kaqaybgalayaashu waxay caddeeyeen baahida loo qabo in la helo nidaam garsoor oo xaqsoor iyo daahfurnaan ku dhisan, kaas oo dembifalayaasha sharciga ku xukuma, isla markaana soo nooleeya kalsoonidii bulshadu garsoorka ku qabtay; taasi oo ah cunsur muhiim u ah taabbagalinta nabadayn waarta.

# Hordhac

Galmudug, oo ah dowlad goboleedka labaad ee ugu da'da yar shanta dowladood ee xubnaha ka ah dowladda federaalka, lana aasaasay 2015, ayaa lagu mideeyey magaalada Dhuusamareeb sannadkii 2018, kadib heshiis awood-qaybsi ah oo dhex maray Ahlu Sunna Waljamaaca (ASWJ) oo ah urur diimeed suufiyo ah, kuwaas oo in ka badan toban sano soo xukumayay qaybo ka mid ah gobolka Galmudug iyo magaalo madaxdiisa, iyo Madaxweynihii Galmudug ee xilligaas, Axmed Ducaale Geelle (Xaaf).[1] Balse, cufnaanta gobolka marka la eego xaaladdiisa bulsho iyo siyaasadeed oo ku suntan kala duwanaansho ballaaran oo xagga qabaa'ilka deggan ah iyo in lagu sifeeyo in uu yahay mid ka mid ah deegaannada dadkiisu ugu hubaysan yihiin ee Soomaalia, ayna ka dhex jiraan kooxo maleeshiyaad ah, qabiillo iyo ururro hubaysan sida Ahlu Sunna Waljamaaca (ASWJ) iyo Al-Shabaab, wuxuu ka dhigan yahay caqabad iyo fursad goonni ah ee nabadaynta.[2]

Cilmibaadhistani waxa ay daaha ka feeydeysaa doorka dhallinyaradu ku leeyhiin geeddi-socodyadaas, iyadoo xoogga saareysa aragtiyaha iyo kaqaybgalka dhallinyarada ee Dhuusamareeb oo ah magaalo ay si qotadheer u saameeyeen colaadihii daba-dheeraday, isla markaana ah xarunta xuddunta u ah dhaqdhaqaaqyada bulsheed iyo siyaasadeed ee dowlad goboleedkan. Dabcan si la mid ah Soomaaliya inteeda kale, dhallinyarada Galmudug waa tirada ugu badan ee bulshada ku dhaqan deegaankaas. Sidoo kale, dhallinyaradu mar waa dhibbaneyaasha ugu badan ee xaaladaha amni darrada marna waa xaabo lagu shido dabka colaadaha. In kastoo dhallinyaradu yihiin tirada ugu badan dadweynaha, haddana inta badan dhallinyarada waa laga faquuqaa hannaananda rasmiga ah ee siyaasadda dowlad goboleedka. Si kastaba ha ahaatee, sida ay muujiyeen doodo-kooxeedyadii kaqaybgalayaashu, dhallinyarada waxa ku duugan aragtiyo muhiim ah, oo la xiriira ilaha iyo asbaababaha colaadaha joogtada ah, iyo sida oo kale jidadka loo mari karo nabadayn iyo dibuheshiisiin dhab ah.[3]

Daraasaddani waxay adeegsaneysaa habab cilmibaadhiseed oo ku dhisan kaqaybgal ficil (participatory action research methodologies), iyada oo xogta daraasaddan laga helay saddex waraysi-kooxeed oo loo qabtay dhallinyarada magaalada Dhuusamareeb, shanti bishii Feebaraayo 2024. Magaalada Dhuusamareeb iyada oo ah xarunta maamulka ee Galmudug, haddana ma aha oo keliya saldhig siyaasadeed iyo ku dowladeed, ee sida oo kale waa barkulan isku xira bulshada deegaanka oo loogu soo hirto fursadaha shaqada, kuwaas oo soo jiita qaybaha kala duwan ee dadweynaha dowlad goboleedka ku nool.[4]

---

1. UNSOM, "International Partners Welcome Creation of a Unified Galmudug Administration," January 1, 2018, https://unsom.unmissions.org/international-partners-welcome-creation-unified-galmudug-administration
2. Bishii Juley 2024, ciidan beeleed hubaysan ayaa caasimadda Galmud ee Caabudwaaq hub kaga qabsaday ciidamada amniga dowladda; eeg "Somalia: Clan Militia Seizes Weapons in Trucks Near Abudwak, Central Somalia," All Africa, July 16, 2024, https://allafrica.com/stories/202407160315.html; also see "Death Toll of Central Somalia Clan Fight Rises to 50, Authorities Call for Ceasefire," Horn Observer, June 9, 2024, https://hornobserver.com/articles/2792/Death-Toll-of-Central-Somalia-Clan-Fight-Rises-to-50-Authorities-Call-for-Ceasefire.
3. Kaqaybgale doodeed oo ku jiray Kooxda Doodda Saddexaad, ayaa yidhi, " Dhallinyaradu waa xaabada lagu shido colaadaha, haddana qayb kama aha hannaanka go'aan gaadhista nabadaynta. Inta badan, dowladdu waxa ay la macaamishaa odayaasha, halkii ay ahayd in xoogga saarto dhallinyarada oo ah kuwa ay mustaqbalkooda saameeyaan colaaduhu."
4. Heritage Institute for Policy Studies, "Productive and Labor Employment Creation for Somalia: Key Challenges and Strategies," July 2020, https://www.humancapital.so/wp-content/uploads/2020/11/Labor-HCDM-REPORT-.pdf

Haddaba, waraysi-kooxeedyadan oo ay ka soo kaqaybgaleen dhallinyaro ku sugan xaallado dhaqan-dhaqaale oo kala geddisan,[5] ayaa noqotay fagaare ay dhallinyaradu ku soo bandhigaan aragtiyohooda ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha nabadda ee ka jira gobolkooda. Cilmibaadhistani waxa looga golleeyahay in la daboolo farqiga u dhexeeya dhaqannadii gaboobay, wadahadallada nabadaynta ee ku kooban oday-dhaqameedka iyo waaqica hadda jira ee ay la nool yihiin dhallinyarada oo ah tirada ugu badan bulshada ee ay sida maalinlaha ah u soo wajahaan khilaafaadka, caqabadaha dhaqan-dhaqaale, caqabadada waxbarasho iyo faquuqyada bulsheed iyo kuwa siyaasadeed ee xididdaystay.[6] Si gaar ah, waxay daraasaddani iskugu dhaftay fikradaha ka tarjumaya jinsiga, iyada oo baadhay aragtiyaha ay qabaan kaqaybgalayaashu lab iyo dheddig ba. Habraacani waxa uu garwaaqsanayaa waayo-aragnimada kala duwan iyo waxtarka gaarka ah ee ay haweenka dhallinyarada ahi u leeyihiin geeddi-socodka nabadaynta, taas oo ay inta badan shiikhiso in si guud la iskugu qaado dhallinyarada, loona arko hal koox oo isku wada mid ah.[7]

Dibu-eegista dhigaallada kaydsan, oo lagu ladhay siyaasadaha qaran ee Soomaaliya ee dhallinyarada iyo nabadaynta ku saabsan, iyo shuruucda caalamiga ahiba waxa ay iftiiminayaan in wiilasha iyo gabdhaha da'yarta ahi la kulmaan caqabo waaweyn, balse ay faquuq iyo takoor u sii dheer yihiin hablaha dhallinyarada ah. Haddaba, wax ka qabashada arrimaha la xiriira jinsiga oo ah kuwo wajiyo badan leh ayaa lafdhabar u ah in la abuuro istaraatiijiyado guud oo waxtar u leh nabadaynta gobolka. Intaas waxa dheer, in fikradaha ka soo maaxday doodaha waraysi-kooxeedyadu ay xoogga saarayaan muhiimadda ay leedahay mudnaansiinta dadaallada nabadaynta deegaannada miyiga ah, halkaas oo ah meelaha ay inta badan ka dhashaan khilaafaadku. Kaqaybgalayaashu waxay ku baaqeen in la qabto barnaamijyo tababar oo dhammaystiran, kuwaas oo ay hormuud ka yihiin hay'adaha dowladdu sida Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibuheshiisiintu, si dhallinyarada loogu qalabeeyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah nabadaynta wax ku oolka ah. Waxay sida oo kale hoosta ka xarriiqeen baahida loo qabo taakulo dhaqaale iyo taageero siyaasadeed oo lagu xoojinayo awoodaynta dhallinyarada, laguna sharciyeynayo doorkooda ku aaddan dadaallada nabadaynta.[8]

# Habraaca Daraasadda

Daraasaddani waxay adeegsatay habraac cilmibaadhiseed oo ku dhisan kaqaybgal-daraasadeed oo fal iyo ficil leh(PAR), kaas oo ah hannaan diiradda saaraya in qaybaha bulshadu si toos ah uga wada kaqaybgalaan daraasadda, gaar ahaan kuwa codkooda la xaqiro. Habraacan waxaa loo xushay si loogu kuurgalo aragtiyaha dhallinyarada ee la xiriira waaqica nabadaynta Galmudug.

5. Kaqaybgalayaashii dooduhu, waxa ay ka kala socdeen haayado kala duwan oo isugu jira, shaqaalaha dowladda, xafiiska degmada, ciidamada booliska, gargaarka aadamenimada, ururrada maxalliga ah, shaqaalaha bulshada, qaybta caafimaadka, kormeerayaal hawleed, waxbarashada, adeegyada qurxinta, iyo xoogsatada.
6. Qorshe-siyaasadeedka Dhallinyarada Dowladda Faderaalka Soomaaliya ee (2023): "Dhallinyarada Soomaaliya looma helin fursado ay si buuxda ugu horumariyaan awooddooda, oo ay ku helaan fursado u suuragaliya in ay kobcaan, horumaraan, una badhaadhaan iyaga oo ah muwaadiniin si buuxda uga qaybqaadanaya, ugana falcelinaya hawlaha dalkooda oo ah kuwo waxsoosaar leh. Xilligii dagaallada sokeeye iyo tonannaankii sano ee dalku bilaa dowladda ahaa, dhallinyaradu may helin fursado horumar oo ay ku liibaanto ama kuwo waxbarasho tayo leh, oo ku habboon baahida dalkooda."
7. Kaqaybgalayaasha doodaha oo ay tiradoodu ahayd 31 qof, waxa haween ahaa 15.
8. FGD participant: "For youth participation in peace efforts to increase, it is crucial for the government institution, particularly the Ministry of Interior, to prioritize internal peace and take effective measures. This includes providing comprehensive training programs for youth, equipping them with the necessary knowledge and skills for peacebuilding."

Habraacan-daraasadeed (PAR) ayaa socday Sebtembar 2023 illaa Agoosto 2024, iyada oo waraysi-kooxeedyo lagu qabtay Dhuusamareeb 13 Febaraayo 2024. Doodahan waxa loo turjumay af Ingiriisi, kadibna waxa turxaanbixin iyo sixitaan luuqadeed ku sameeyay cilmibaarayaasha Machadka Daraasaadka Siyaasaadka ee Heritage.

Machadka Heritage (HIPS) waxa uu iskaashi dhow la sameeyay saaxiibada gudaha/maxalliga ee ay shaqo wadaagta yihiin, gaar ahaan Xarunta Cilmibaadhista iyo Wadahadalka ee Galmudug (GRD), iyo sida oo kale qaar ka mid ah ururrada bulshada rayidka ah iyo weliba saraakiil iyo hay'ado dowladeed oo ay ka mid yihiin Madaxweyne Kuxigeenka Galmudug, Cali Daahir Ciid, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha iyo Wasaaradda Haweenka, Carruurta, iyo Xuquuqul Insaanka ee Galmudug.

Daraasaddani waxa ay kaqaybgalka dhallinyarada u martay hawlgallo kala duwan oo ay ka mid yihiin waraysi-kooxeedyo ka duulaya isdhexgalka jiilasha da'da yar, kulanno maan-tuujin ah, fadhiyo gabayo tirin ah (poetry), kuwo sheeko-tebin ah iyo sida oo kale doodo ay iskula falgalayaan jiilasha kala duwan. Si kastaba ha ahaatee, daraasaddani waxay ka shidaalqaadanaysaa fikradaha iyo waayo-aragnimada laga weeleeyay waraysi-kooxeedyadii lagu qabtay Dhuusamareeb oo ah magaalo-madaxda dowlad goboleedka Galmudug. Si istaratiiji ah ayaa loo bartilmaameedsaday Dhuusamareeb, iyada oo lagu xushay muhiimadda ay u leedahay isbeddelka siyaasadda-bulsheed ee gobolka, taas oo ka soo guurtay meel qabiil ka taliyo oo ay ahayd wixii ka horreeyay 2018, xilligaas kadibna isu beddeshay goob afkaaro ku loollamayaan oo xarun u ah nidaam dowladeed.[9]

Laga soo bilaabo 2008, awoodo siyaasadeed oo kala duwan, oo ay ku jiraan Ahlu Sunna Waljamaaca, Al-Shabaab, Dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada (kadib dhismihii Galmudug ee sannadkii 2015) ayaa u kala baratamayay awoodda gobolka. Iyadoo dowladda federaalku isku dayday in ay maamulka dalka oo dhan gacanteeda soo geliso si ay u midayso qaranka. Haddaba, isbeddelkaas baaxadda leh ee ka dhacay Galmudug, waxa uu ka tarjumayay isbeddel ballaaran oo dhanka kaqaybgalka bulsheed iyo siyaasadeed ah oo ka jira Dhuusamareeb, kaas oo magaalada ka dhigaysa goobta ugu habboon ee laga sahamin karo aragtida ku saabsan nabadaynta iyo dibuheshiisiinta.

Saddexda waraysi-kooxeed waxay si taxaddar leh u hubiyeen in ay kaqaybgalayaashu sida ugu ballaaran u matalaan dhallinyaro ka soo kala jeedda qabiilooyin kala duwan iyo xaalado dhaqan-dhaqaale oo kala geddisan. Habraacan ayaa looga gollahaa in loogu kuurgalo kala duwanaanshaha qaybaha bulsheed ee gobolka. Xarunta Cilmibaadhista iyo Wadahadallada ee Galmudug (GRD) oo uu taageerayo Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage (HIPS) ayaa gacan ka gaystay qaadashada/qorista kaqaybgalayaasha saddexda waraysi-kooxeedba.

9. Kadib qaran jabkii Soomaaliya ee dhacay bishii Jannaayo 1991, Galmudug (iyo Mudug) iyo gobolka Galguduud oo u qaybsama laba magaalo, iyo tuulooyin ay ku badan yihiin jifooyin qabiil oo uu inta badan dagaal ka dhexeeyay. Cadaado ayaa mar ahayd caasimadda hal qabiil, sida oo kale, Dhusamareeb, Galkacyo, Caabudwaaq, Ceeldheer, Ceelbuur, Balanbaalle, Huurshe, Guriceel iyo Xeraale ayaa xataa dhammaantood noqday magaalooyin iyo tuulooyin ay leeyihiin beelo gaar ahi, kuwaas oo ugu yeedha gurigoodii. Wixii ka danbeeyay 2008, Urur Diineedka Sunna Waljameeca, al-Shabaab iyo DFS iyo dowladda Galmudug waxa ay bilaabeen in ay awooddooda isugu geeyeen. Maanta, Galmudug waxa gacanta ku haya dowladda Galmudug oo ay musdanbeed u tahay DFS, marka laga reebo degmooyin kooban oo ku yaalla dhinaca bari ee u dhow Badweynta Hindiya.

Dhammaan doodaha waraysi-kooxeedyada (FGDs) waxaa lagu qabtay Af-Soomaali. Maadaama nidaamka hab-dhiska iyo naxwaha labada luqadood kala duwanyahay, tarjumaadda eray-raaca ah waxa loo arkay in ay lumin karto macnaha ay ka qaybgalayaashu maanka ku hayeen ama in ay ka dhalan karaan tarjumaado aan toolmoonayni. Sidaas darteed, waraysi-kooxeedyada waa la qoray, kadibna waxa loo tarjumay af Ingiriisi, iyada oo lagu dadaalay ilaalinta saxnaanta iyo sugnaanta jawaabaha ka qaybgalayaasha. In kasta oo aannu si kasta ugu dadaalnay in aannu soo gudbino tarjumaadda ugu macquulsan, haddana waxa laga yaabaa in meelo yar yar loo sii qurxiyay si loo caddeeyo fahanka iyo ujeeddada hadalka. Si loo ilaaliyo dhowrsanaanta aqoonsiga kaqaybgalayaasha, waxa aannu isticmaalnay magacyo maldahan oo lagu muujiyay tirooyin. Waxaa xusid mudan, in qaar ka mid ah ka qaybgalayaashu jawaabo badan ka bixiyeen hal su'aal, sidaas darteed waxa laga yaaba in jawaabahooda ay ka muuqdaan meelo kala duwan oo isla su'aashaas ah.

Waraysi-kooxeed kastaa wuxuu ka koobnaa toban ilaa kow iyo toban kaqaybgale, taas oo tirada guud ka dhigeysa 31 qof. Haseyeeshe, qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha doodda, ayaa qodobbo kala duwan uga tagay sababo kala geddisan  awgood, halka ay qaar kalena  door bideen in aanay ka jawaabin su'aalaha qaarkood.

## Macluumaadka Kaqaybgalayaasha

Cilmibaadhayashu waxa ay soo ururiyeen xogaha shakhsiga ah ee kaqaybgalayaasha, sida da'da, heerka waxbarashada, shaqada iyo nooca jinsiga. Saddex iyo labaatan ka mid ah kow iyo soddonka kaqaybgale ayaa buuxiyey foomka qiimaynta. Lix qof oo ka mid ah saddex iyo labaatanka kaqaybgale ee foomka buuxiyey waxa ay da'doodu ahayd inta u dhexeeysa 18 ilaa 25 sano, halka ay toddoba iyo toban ka mid ahna ay ahayd inta u dhexeeysa 26 ilaa 35b sano; halka ay shan iyo toban ka mid ah kow iyo soddonkana ay ahaayeen gabdho.

Sidoo kale, labaatan ka mid ah saddex iyo labaatankaa foomka buuxiyay waxay ahaayeen kuwo ka qalinjabiyay jaamacad, labo na waxay dhammaysteen waxbarashada dugsiga sare, halka uu hal mid dhammaystay dugsiga hoose dhexe. Tirada inta soo hartay ma buuxin foomka qiimaynta. Tirada ugu badan waxay ahaayeen dad shaqeeya. Haddaba, toddoba iyo toban ka mid ah saddex iyo labaatanka xusay xaaladdooda shaqo waxay ka kala shaqaynayeen goobahan: shaqaalaha rayidka ah, maamulka degmada, ciidanka booliiska, samafalka iyo hay'adaha aan dowliga ahayn, taakulaynta bulshada, waaxda caafimaadka,kormeer shaqo, waxbarashada, saaloon, hal midna wuxuu ahaa xirfadle shaqada gacanta ah. Halka lix ka mid ah saddex iyo labaatanka foomka qiimaynta buuxiyay ay ahaayeen shaqo la'aan.

Doodaha waxaa loo agaasimay hab ku salaysan mawduucyo aasaasi ah, sida waxyaabaha huriya rabshadaha maxalliga ah, saamaynta qofeed ee ay colaadaha socdaa ku yeeshaan dhallinyarada iyo doorka dhallinyarada ee hindiseyaasha nabadda.

Habraacan waxa loo dejiyay, ma aha in la soo ururiyo xog tayo-raac ah oo mug leh oo kaliya, balse waa in ay sida oo kale kaqaybgalayaashu si firfircoon ula falgalaan, uguna dhiirigeliyaan in ay si furan u cabbiraan aragtiyahooda, waxna ugu biiriyaan doodaha xal-raadiska ku dhisan.

Marka laga tago habraaca kowaad ee xog ururinta, oo ku salaysan waraysi-kooxeed, waxa kale oo ay daraasaddu ku lartay dibumilicsi-dhigaaleed lagu sameeyay cilmibaariso hore iyo iyo siyaasadaha dowladda ee ku saabsan dhallinyarada iyo nabadaynta. Dibumilicsigaasi waxa uu si dhow ugu kuurgalayaa hababka ugu wanaagsan iyo itijaahaadka ka jira heer gobol, qaaradeed iyo caalami intaba, isaga oo xog ballaaran ka bixinaya fahanka caqabadaha ku xeeran iyo doorka ay dhallinyaradu ku leeyihiin geeddisocodka nabadaynta. Haddaba, isku dhafka ilo-xogeedyadaas kala duwan ayaa xaqiijiyay in daraasaddu diiradda saarto xaqiiqooyinka deegaanka, aragtiyaha guud  iyo shuruucda siyaasadeed –  ee heer qaran iyo heer caalamiba.

Iyada oo la is barbardhigayo, la isuna miisaamayo natiijooyinka maxalliga ah iyo aragtiyaha caalamiga ah, waxa daraasadda looga gol lahaa in lagu hubiyo aaraahda/sheegashada doodo-kooxeedyada iyo qiimaynta dhigaallada cilmibaariseed ee baaxadda leh iyo doodaha siyaasadeed ee ku saabsan dhallinyarada iyo doorkooda - ama door la'aantooda- bulsheed. Dibumilicsiga dhigaallada khuseeya siyaasadaha Soomaaliya, Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobey ayaa noqday agab muhiim u waaqiciyaynta iyo xaqiijinta natiijooyinka doodaha ka dhashay waraysi-kooxeedyada, taas oo suuragalisay in aanay cilmibaadhistani ka turjumin xaaladda Galmudug oo keli ah, balse ay sida oo kale la jaanqaaddo, waxna ku biiriso qorshaha guud ee ku saabsan kaqaybgalka  dhallinyarada ee ku aaddan nabadaynta  adduunweynaha.

## Ujeeddooyinka Cilmibaadhista

Ujeeddada ugu weyn ee cilmibaadhistan laga lahaa waa in la fahmo doorka ay dhallinyarada Galmudug ku leedahay nabadaynta iyo dibuheshiisiinta, iyada oo laga duulayo aragtidaya iyo waayo-aragnimada dhallinyarada laftooda. Si faahfaahsan, waxa ay daraasaddu u golleedahay:

1. In ay qiimayso dareennada ay qabaan dhallinyarada ay saameeyeen rabshadaha ka dhaca Galmudg
2. In la fahmo kaalinta ay dhallinyaradu ka ciyaari karto nabadaynta iyo dibuheshiisiinta.
3. In la aqoonsado caqabadaha xannibaya doorka dhallinyarada ee ku aaddan kaqaybqaadashada dibuheshiisiinta iyo nabadaynta Galmudug, iyo sidii xal loogu heli lahaa.
4. In la aqoonsado hindiseyaasha maxalliga ah ee looga golleeyahay in kor loogu qaado doorka dhallinyarada, si ay u noqdaan nabad-dhisayaasha Galmudug.

## Su'aalaha Cilmibaadhista

Su'aalaha aasaasiga ah ee cilmibaadhistu waa kuwan:

1. Waa maxay dareenkaaga ku saabsan khilaafaadka rabshadaha wata ee ka dhacay Galmudug?
2. Waa maxay doorka dhallinyaradu ku leedahay nabadaynta iyo dibuheshiisiinta Galmudug?
3. Waa maxay caqabadaha xaddidaya kaqaybgalka dhallinyarada ee ku aaddan nabadaynta iyo dibuheshiisiinta  Galmudug?
4. Waa maxay hindiseyaasha iyo dhaqdhaqaaqyada ugu waa weyn ee maxalliga ah ee ku caawin kara dhallinyarada Galmudug in ay kaqaybqaataan nabadaynta iyo dibuheshiisiinta?

# Aragtiyaha Doorka Dhallinyaradu ku Leedahay Nabadaynta

Si, si hufan loogu qiimeeyo in ay aragtiyihii ka soo baxay waraysi-kooxeedyadii dhallinyarada Dhuusamareeb la jaanqaadayaan guud ahaan istaratiijiyadaha nabadaynta, waxa muhiim ah in aan aragtiyahooda la barbardhigin  oo kaliya yoolasha qaran ee dhallinyarada Soomaaliya iyo nabadaynta, balse sida oo kale waa in lala eego qorsheyaasha dhallinyarada ee heer gobol, heer qaaradeed iyo kuwa calamiga ahba.  Haddaba, iyada oo la isku xidhayo qorshe-hawleedyadaas , waxa kale oo aannu u gollahayn in aannu iftiiminno sida ay hindiseyaasha ay dhallinyarada Dhuusamareeb hormuudka ka yihiin u waafaqsan yihiin, amaba uga soo horjeedaan qorshayaasha ku saabsan doorka dhallinyarada iyo kaqaybgalka nabadaynta ee heer qaran, heer goboleed iyo heer caalami-intaba.

## Qorshe-hawleedka Dibuheshiista Qaranka iyo Ajandaha Dhallinyarada Soomaaliyeed

Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaranka ee Soomaaliya [Somalia's National Reconciliation Framework (NRF)], oo la daahfuray bishii Abriil 2024, ayaa ka dhigan guul masiiri ah oo dalka u jihaynaysa nabad waarta.

Qorshe-hawleedkan oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibuheshiisiintu, ayaa ka dhaqangalay guud ahaanba heer federaal, dowlad goboleed iyo degmo, isaga oo xal u raadinaya uurkutaallooyinka ka dhashay colaadaha dabo-dheeraatay, isla markaana xoojinaya dibuheshiisiinta, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo deegaannadii ay horay u haysteen kooxda Al-Shabaab. [10] Isaga oo ka duulaya in la gaaro hab wada-ogol ah iyo xalal waara, waxa uu Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaranka ee Soomaaliya,xoogga saarayaa kaqaybgalka loo dhan yahay, waxaanu midaynayaa hay'adaha caddaaladda, booliiska, madax-dhaqameedka, hoggaan-diimeedka, ururrada haweenka iyo ururrada dhallinyarada. Qorshe-hawleedkan ayaa iftiiminaya muhiimadda doorka dhallinyarada, kuwaas oo ay tamartooda iyo hal-abuurkoodaba loo arko in ay lafdhabar u yihiin dhalinta isbeddel togan oo dalka ka hirgala iyo bogsiinta dhaawacyada jiilasha kala duwan.[11] Sida oo kale, Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada Soomaaliya (National Youth Policy/NYP), oo dhammaystiraysa Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaranka ee Soomaaliya, ayaa beegsanaysa waxkaqabashada caqabadaha gaarka ah ee ay la kulmaan dhallinyarada Soomaaliyeed, sida shaqo la'aanta, amni la'aanta iyo fursadaha kooban ee waxbarashada, kuwaas oo dhammaantood curyaamiyay in ay dhallinyaradu ka qaybqaataan nabadaynta.[12] Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada Soomaaliya, waxa ay tilmaameysaa ujeeddooyin istaratiijiyadeed oo lagu xoojinayo waxbarashada iyo tababarrada farsamada-gacanta, kor loogu qaadayo shaqo-abuurka, lagu kobcinayo amniga,korna loogu qaadayo in dhallinyaradu kaqaybgasho maamulka dowladda; taas oo waafaqsan horumarinta dhallinyarada ee ku aaddan guud ahaan dadaallada nabaddaynta ee heer qaran.[13]

# Qorshe-hawleedyada Goboleed iyo kuwa Qaaradeed

Marka loo eego heer gobol, Qorshaha Midowga Afrika ee 2063[14] iyo Axdiga Dhallinyarada Afrika[15], waxa ay dhigayaan qorshe-hawleedyo xooggan oo ku saabsan awoodaynta dhallinyarada, sinnaanta jinsiga iyo u dhammaanta kaqaybgalka hannaanka maamulka iyo go'aan-gaarista. Dhigaalladani waxay u qareemayaan kaqaybqaadashada dhallinyarada ee ku aaddan hindiseyaasha nabadda iyo horumarka, iyaga oo garowsan in ay dhallinyaradu horseedi karaan isbeddel togan, islamarkaana xal u keeni karaan caqabadaha dhaqan-dhaqaale, si meesha looga saaro dhallinyarada kaqaybqaadanaysa colaadaha.

Si taas la mid ah, Siyaasadda Dhallinyarada ee Urur Goboleedka IGAD, ayaa hoosta ka xarriiqaysa muhiimadda ay leedahay in ay dhallinyaradu si macno leh uga qaybgalaan

---

10. UNDP Somalia, "Explainer: What is the National Reconciliation Framework of Somalia," May 21, 2024, https://undpsom.medium.com/explainer-what-is-national-reconciliation-framework-of-somalia-a919d8c57ccf
11. Dowladda Faderaalka Soomaaliya, "Qorshe-hawleedka Qaran ee Dibuheshiisiinta," Abril 2024, p. 29. "Dhallinyaradu waxay soo bandhigeen feker lagu gaari kaaro dibuheshiisiin, iyaga oo tamartooda iyo hal-abuurkooda ku dhalinaya isbeddel togan. In dhallinyarada laga qaybgaliyo geeddisocodka dibuheshiisiinta qaranka, iyada oo dadaalladaas loo marayo dugsiyada, jaamacadaha, iyo goobaha ciyaaraha, ayaa dardargalin karta in ay si firfircoon oo xamaasadaysan uga qaybqaataan geeddisocodka dibuheshiisiinta, si loo kobciyo midnimada, loona daweeyo boogaha ku xeeran isdhexgalka jiilasha kala duwan."
12. Somali Youth Hub, "Press Statement: The Somali Cabinet Approved the National Youth Policy," May 11, 2023, https://youthhub.gov.so/press-statement-the-somali-cabinet-approved-the-national-youth-policy/
13. Dowladda Federaalka Soomaaliya, "Siyaasadda Dhallinyarada Qaranka," 2023, p. 47. " Waxqabadyada Mudnaanta Koowaad leh: 1. In haweenka da'da yarta ah iyo raggaba si buuxda looga qaybgaliyo geeddisocodka hawlaha nabadda iyo dowlad-dhiska, laga bilaabo marxaladaha qorsheynta ee bilowga hore, illaa iyo hirgelinta iyo kormeerka."
14. African Union. "Agenda 2063: The Africa We Want," January 2015, https://au.int/Agenda2063/popular_version
15. African Union. "African Youth Charter," 2006, https://au.int/en/treaties/african-youth-charter

nabadaynta, iyada oo diiradda la saarayo waxbarashada, shaqo-abuurka iyo habka kaqaybgalka loo dhan yahay. Siyaasaddani waxay ku baaqeysaa in la helo hoggaan dhallinyaro, islaxisaabtan iyo sinnaan dhanka jinsiga ah, iyada oo xoogga saaraysa iskaashiga ka dhexeeya xubnaha dowladaha iyo daneeyayaasha kale, si sare loogu qaado in dhallinyaradu kaqaybqaadato geeddisocodka nabadayta.[16]

# Qorshaha Caalamiga ah ee Nabadda iyo Amniga  Dhalliyarada

Caalami ahaan, Qorshaha Qaramada Midoobey ee Dhallinyarada, Nabadda iyo Amniga, oo uu Golaha Qaraarka  Amniga ee Qaramada Midoobey (UNSCR) soo saaray 2250,  ayaa xoojinaya  shan tiir, oo kala ah: kaqaybgalka, ilaalinta, ka hortagga, kaqaybnoqoshada iyo ka waantoobidda rabshadaha iyo dibumidaynta bulshada.[17] Qorshahani waxa uu u doodayaa in ay dhallinyaradu si weyn uga qaybqaataan geeddisocodyada nabadda, isaga oo shaaca ka qaadaya baahida loo qabo isbeddello qaab-dhismeed, ilaalinta xuquuqda aadamaha iyo maalgelinta karaanka dhallinyarada.

Haddaba, habkan caalamiga ahi waxa uu hoosta ka xarriiqayaa muhiimadda ay leedahay in la abuuro bay'ad/deegaan dhallinyarada u suurtagelinaya in ay si wax ku ool ah wax ugu biiriyaan dadaallada nabadda iyo amniga, kuwaas oo waafaqsan ujeeddooyinka ku cad istaratiijiyadaha qaran ee Soomaaliya.  Iyada oo fikradaha ka soo baxay doodahii dhallinyarada Dhuusamareeb la barbardhigayo qawaaniinta guud ee jira, daraasaddu waxay hoosta ka xarriiqaysaa sida ay hindiseyaasha maxalliga ah ee Soomaaliya uga qaybqaadan karaan qorshayaasha caalamiga ah ee nabadda iyo amniga dhallinyarada. Si kastaba ha ahaatee, waxa ay cilmibaaristu  sidoo kale muujisay gaabisyo iyo caqabado ku gadaaman IGAD. "Siyaasadda IGAD ee Dhallinyarada," 2023, "Xoojinta awoodda dhallinyarada iyo ururrada dhalinyarada ku leeyihiin nabadaynta, ka hortagga, maaraynta iyo xallinta colaaaha, iyada oo loo marayo kor u qaadista barashada isdhexgalka dhaqannada kala duwan, waxbarashada madaniga ah, dulqaadka, barashada xuquuqda aadanaha, maamul wanaagga, dimuqraadiyadda, ixtiraamka labada dhinac ee dhaqanka, qowmiyadaha iyo diinta kala duwan, muhiimadda wadahadalka iyo iskaashiga, mas'uuliyadda, wadajirka iyo iskaashiga caalamiga ah." hirgelinta qorshe-hawleedyadan oo heer dadweyne ah, gaar ahaan qaar ka mid ah gobollada Soomaaliya sida Galmudug.[19] Halkaas oo ay khilaafaadka joogtada ah iyo culaysada bulsheed iyo kuwo siyaasadeed  noqdeen caqabadaha ugu waa weyn ee hortaagan in dhallinyaradu si waxtar leh uga kaqaybqaataan nabadaynta.

---

16. IGAD. "The IGAD Youth Policy," 2023, "Strengthen the capacity of youth and youth organizations in peace building, conflict prevention, management and resolution through the promotion of intercultural learning, civic education, tolerance, human rights education, good governance, democracy, mutual respect for cultural, ethnic and religious diversity, the importance of dialogue and cooperation, responsibility, solidarity and international cooperation," https://igad.int/wp-content/uploads/2024/07/IGAD-YOUTH-POLICY-Popular-Version.pdf
17. Sarah Smith, The United Nations: A champion for youth. Dag Hammarskjöld", 2020, p. 3. Accessed at: https://www.daghammarskjold.se/wp-content/uploads/2020/04/dd-paper_no28_2250.pdf
18. United Nations. "The Youth, Peace and Security Agenda," UNSCR 2250, https://www.un.org/peacebuilding/policy-issues-and-partnerships/policy/youth
19. Crisis Group, "Avoiding a New Cycle of Conflict in Somalia's Galmudug State," 25 September 2023, https://www.crisisgroup.org/sites/default/files/2023-09/b193-somalia-galmudug-state_0.pdf. "waxa jira xiriir dhow oo ka dhexeeya dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee Galmudug iyo kuwa Muqdisho. Isaga oo gobolku leh waxoogaa dakhli ah oo kooban, waxa uu ku tiirsan yahay kabka caasimadda, taas oo gobolka ku leh saamayn weyn iyo dano baaxad. Xiriirkan ayaa caqabad hor leh ku ah in ay Galmudug hesho xasillooni waarta, marka loo eego marka loo eego faragalinta Muqdisho uga sii daraysa xiisadda halkii dhibaatooyinka jira ka xallin lahayd."

# Aragtiyaha ka soo Baxay Doodihii Waraysi-kooxeedyada

Aragtiyaha ka dhasha doodihii waraysi-kooxeedyadu waxa ay muujiyeen in ay dhallinyaradu si weyn ula socdaan caqabadaha iyo fursadaha ka jira gobolkooda. Waxa ay kaqaybgalayaashu carrabka ku adkayeen baahida degdegga ah ee loo qabo waxbarasho horumarsan iyo fursado shaqo-abuurid, kuwaas oo ka tarjumaya hortabinnada lagu qeexay Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada Soomaaliya (NYP). Waxaa aad loo xoojiyay muhiimadda ay leedahay in dhallinyaradu kaqaybqaataan hindiseyaasha nabadda iyo hababka go'aan-gaarista, kuwaas oo waafaqsan mabaadi'da ku xusan Qaraarka Golaha Amniga ee Qaramada Midoobey (UNSCR) ee 2250 iyo Qorshe-hawleedka Midowga Afrika. Tusaale ahaan, kaqaybgale ayaa yiri "dhallinyarada Galmudug waxay hormuud u noqon karaan kor u qaadidda wacyiga dadweynaha, iyaga oo abaabulaya in dugsiyada waxbarashada lagu qabto aqoon-iswaydaarsiyo iyo tababarro ku saabsan barashada nabadda, fududaynta doodo dhex mara qaybaha kala duwan ee bulshada ama aasaasidda guddi dhallinyaro oo nabadeed.[20]

Ururrada dhallinyarada, ee ay ka midka yihiin ururka Nabadda iyo Horumarinta ee Gaalkacayo, Wakiillada Nabadda, IPN Galmudug iyo Elman Peace, waa ururro si firfircoon uga qaybqaata dadaallada nabadda iyo dibuheshiisiinta Galmudug. Ururradaasi waxa ay iskaashi la sameeyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dibuheshiisiinta, oo ay weheliyaan hay'ado kale oo dowladdeed, iyada oo diiradda la saarayo kor u qaadista wacyiga iyo qabashada barnaamijyo nabadayneed. Haseyeeshee, ururradaasi waxay la kulmaan caqabado waa weyn, gaar ahaanna in madax-dhaqameedka iyo hoggaamiyayaasha siyaasadeeddu ka faquuqaan hannaanka go'aan-gaarista, taas oo xaddidaysa saamayntooda iyo wax qabadkooda.[21]

# Iswaafajinta Qorshe-hawleeddada iyo Aragtiyaha Maxalliga ah

Iyada oo qorshe-hawleedyada goboleed, qaaradeed iyo kuwa caalamiga ahba la barbardhigayo, laguna qiimaynayo xaaladda gaarka ah ee Galmudug, ayaa waxaa soo ifbaxay dhowr meelood oo aan iswaafaqsanayn iyo caqabado cadcad. Taas oo sii xoojineysa in si firfircoon loo hirgaliyo kaqaybgelinta dhallinyarada ee dhammaanba heerarka go'aan-gaariseed ee la jaanqaadaya Qaraarka Golaha Amniga ee Qaramada Midoobey (UNSCR) ee tirsigiisu yahay 2250 iyo qawaaniinta Midowga Afrika.

---

20. FGD 1, a male participant.
21. Intii lagu gudo jiray koox-doodeedyada, erayada kala ah " laga saaray" iyo "kasaarid " waxa marxaladda dhallinyarada iyo go'aangaarista loo adeegsaday in ka badan toban jeer.

Si taas la mid ah, dhallinyarada Galmudug waxay codsadeen in loo sameeyo madalo iyo fagaarayaal lagu doodo iyo in ay matalaad ku yeeshaan wadahadallada nabadda,  iyaga oo iftiimiyay sida loogu baahan yahay in la helo xayndaabyo sharci oo waajib ka dhigaya ka qaybgelinta dhallinyarada iyo kobcinta doodaha u dhexeeya jiilasha kala duwan. Sare u qaadidda fursadaha waxbarasho iyo tababarrada xirfadeed, ayaa lama huraan ah sida ku cad Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada Soomaaliya (NYP).

Dhallinyarada Galmudug waxay carrabka ku xoojiyeen in waxbarasho tayaysan iyo tababarro farsamo-gacmeed lagama maarmaan u yihiin sidii dhallinyarada looga horjoogsan lahaa ku biirista kooxaha xagjirka ah. Sida oo kale, sugidda maalgelin ka timaada hay'adaha caalamiga ah iyo urur goboleedyada oo lagu taakulaynayo hindiseyaasha ay dhallinyaradu hormuudka u yihiin ayaa lama huraan u ah abuuridda  fursado ay dhallinyaradu kula jaanqaadi karaan istaratiijiyadaha Urur Goboleedka Horumarinta (IGAD), si loo gaaro kaqaybgal dhallinyaro oo tayayn iyo taageero buuxda haysta.[22] Dhallinyarada Galmudug waxay sidoo kale tilmaameen in taageero la'aanta dhaqaale  tahay caqabad weyn oo hortaagan in dhallinyaradu kaqaybgalaan dadaallada nabadaynta.[23]

Sidaas oo kale, waxa muhiim ah in la hirgeliyo siyaasado lagaga gudbayo culaysyada ka imanaya qaabdhismeedyada soo jireenka ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin in la abuuro deegaanno suuragalinaya in ay dhallinyaradu si xor ah oo aan cabsi iyo cunfi lahayn uga qaybgalaan arrimaha bulshadooda. Taabbagalinta habab tixgelinaya jinsiga oo ay ku dhan yihiin barnaamijyo u adeegaya jiilasha kala duwan ee dhallanyarada ayaa kor u qaadi kara in haweenka da'yarta ahi si firfircoon uga kaqaybgalaan dadaallada nabadda iyo kuwa amniga—waa baahi ay si xooggan uga hadleen gabdhaha dhallinyarada ahi intii lagu guda jirey waraysi-kooxeedyada.[24]

Caqabadaha baahsan ee ku gadaaman arrimaha nabadaynta iyo xaddidnaanta ilaha khayraadka ee muhiimka u ah xoojinta nabadda iyo awoodaynta dhallinyarada dartood, waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo halbeegyo la gula soconayo dhaqangelinta dhabta ah ee siyaasadaha dhallinyarada iyo hubinta islaxisaabtanka ee daneeyayaasha dhexdooda. Haddaba, habkan iskudhafan ayaa muujinaya wada-ogolka iyo iswaafaqsanaanta ka dhex jirta hannaannada qaran, qaaradeed iyo kuwa caalamiga ah ba, iyo sida oo kale baahiyaha gaarka ah iyo qorshayaasha ka yimid dhallinyarada Galmudug. Haddaba, Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaranku waa in uu ka jawaabaa baahiyaha qaarka ah ee ay sheeganayaan dhallinayarad deegaanku. Habkan, oo lagu daro adkaynta nabadda, ayaa ku awoodayn kara dhallinyarada in ay noqdaan diranayaal firfircoon oo isbeddel u horseeda bulshooyinkooda.

---

22. IGAD, "IGAD Youth Policy 2023: A Resilient, Peaceful and Prosperous Youth," 2023, https://igad.int/wp-content/uploads/2024/07/IGAD-YOUTH-POLICY-Popular-Version.pdf.
"Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa la aqoonsaday, waxaanay xuseen in ay fiiro gaar ah siiyaan Dhaqangeliyeyaasha Siyaasadda iyo jilayaashu, iyada oo ah lagu sababaynaayo xaaladdooda nugul iyo duruufaha nololeed ee ku gadaaman. Sidaas darteed, kooxahani waxay u baahan yihiin barnaamijyo gaar ah oo ku wajahan siyaasadda, qoondaynta miisaaniyadda iyo khayraadka heer qaaradeed, goboleed iyo heer qaranba."
23. Mid ka mid ah raggii kaqaybgalay dood-kooxeeddii 1, ayaa sharaxaya, " In agab la'aantu tahay caqabadda ugu weyn dhallinyarada ka hortaagan kaqaybgalka dadaallada dibuheshiisiinta. Dhallinyaradu waxay hayaan tamar iyo xamaasad ay ku keenaan isbeddel, laakiin inta badan ma helaan taageero dhaqaale oo ay ku abaabulaan madalo xafladeed, kuna faafiyaan ololе wacyigelineed, ama ku safraan si ay ula kulmaan xubnaha bulshada. Bixinta kheyraadka iyo maalgelinta fursadaha waxay awood siin kartaa dhalinyaradu inay noqdaan wakiilo firfircoon oo heegan u ah nabada bulshadooda."
24. One male, FGD1 participant, explains, "A major barrier to youth participation in reconciliation efforts is the lack of resources. Young people have the energy and passion to make a difference, but they often lack the financial support to organize events, spread awareness campaigns, or travel to meet with community members. Providing resources and funding opportunities can empower young people to become active agents of peace in their communities."

Intaas waxa dheer, in casharrada laga bartay geeddi-socodyada nabadda ee ay Soomaalidu hoggaaminayaan, oo xoogga saaraya lahaanshaha dadka deegaanka ah iyo hababkooda nabadayneed ee soo jireenka ah, ayaa bixinaya fikrado wax ku ool ah oo si waxtar leh loogu horumarin karo istaratiijiyadaha kaqaybgalka dhallinyarada ee la xiriira dadaallada nabadaynta. Daraasad ballaaran oo ay samaysay haayadda Interpeace oo shaaca ka qaadday waxyaabaha ka dhaqangalka ah hannaanka nabadda ee maxalliga ah ayaa ku doodeysa in aanay "Nabadayn iyo dowlad-dhis toona ka hirgeli karin deegaannada Soomaalida, illaa la helo kaqaybgal ballaaran oo ay u dhan yihiin dadka Soomaaliyeed".[25] Mustaqbalka Afrika, wuxuu ku jiraa dhallinyaradeeda, ayuu leeyahay Midowga Afrika,[26] waayo sida laga soo xigtay Fagaaraha Dhaqaalaha Adduunka (World Economic Forum), "marka la gaaro sannadka 2035, waxa jiri doona dhallinyaro badan oo Afrikaan ah oo sannad walba ku biiraya suuqa shaqada, kuwaas oo ka badan dunida kale oo laysku daray."[27] Dabcan, Soomaaliyana taas kama duwana, sida lagu caddeeyay warbixinta Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobey (UNDP) ee soo baxday 2012, taas oo gunaanadkeedu ahaa: "mustaqbalka Soomaaliya wuxuu ku jiraa gacmaha dhallinyarada."[28]

# Al-Shabaab

Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay bixiyeen fikrado ku saabsan waxyaabaha kaqaybqaata khilaafaadka ka dhaca Galmudug, gaar ahaan kuwa khuseeya doorka al-Shabaab. Haddaba, u tiirinta kaqaybgalayaasha ee jiritaanka, amaba la'aanteeda, waxay muujisay sida murugsanaanta iyo kala geddisnaanta arragtiyaha laga qabo saamaynta kooxdan hubaysani ku leedahay isbeddellada nabadda iyo ammaanka gobolka.

Marka la eego kaqaybgalayaasha ragga ah, waxa ay aragtiyahoodu u muuqdaan kuwo colaadaha gobolka ka dhaca u aanaynaya falalka al-Shabaab. Tusaale ahaan, hal kaqaybgale (FGD1YW2) ayaa tilmaamay in khilaafaadka qabaliga ah iyo al-Shabaab yihiin labada qodob ee asalka u ah xasillooni darrada Galmudug.

Kaqaybgale kale (FGD2YM10) ayaa sii balballaariyay farsamooyinka muquuninta ku dhisan ee uu ururka al-Shabaab adeegsado, isaga oo xusay in ay kooxdaani qabiillada ku qasbaan in ay colaadaha galaan, iyaga oo ku handadaya haddii aaney isku dhacyadaas kaqybqaadan in ay luminayaan deegaannadooda. Si taas la mid ah, kaqaybgale kale (FGD3YM8) ayaa daaha ka qaaday xeeladaha ay al-Shabaab u adeegsadaan in uu sii dabadheeraado khilaafaadka u dhexeeya qabiillada ku hoos nool maamulkoodu, isaga oo carrabka ku adkayeeyay kaalinta kooxdu ku leedahay joogtaynta xasillooni darrada oo ay u maraan xoog ku muquunin.

25. This could involve providing resources, funding opportunities, and mentorship programs to help youth initiatives flourish. Interpeace, "The Search for Peace: Lessons from Somali-led Peace Processes 1991–2007," 20 April 2009, https://www.interpeace.org/2009/04/the-search-for-peace-somali-led-peace-processes-1991-to-2007/.
26. African Union, "Africa's Future is Youth-Led, the AU Prioritizes Young Voices at the 37th AU Summit," 18 February 2024, https://au.int/es/node/43558
27. World Economic Forum, "How Africa's Youth Will Drive Global Growth," 16 August 2023, https://www.weforum.org/agenda/2023/08/africa-youth-global-growth-digital-economy/
28. UNDP, Somalia Human Development Report 2012: Empowering Youth for Peace and Development, https://www.undp.org/sites/g/files/zskgke326/files/publications/HDR-Somalia-2012-E.pdf

Balse figradihii ay cabbireen kaqaybgalayaashii dumarka ahaa ayaa muujiyay aragtiyo taas ka duwan. Tusaale ahaan, kaqaybgale dumar ah (FGD3YW1) ayaan colaadaha toos ah u la xiriirin al-Shabaab, balse waxa ay diiradda saartay saamaynta ballaaran ee ay ku leeyihiin rabshadaha dhacaya, sida kororka dhibaatooyinka jireed iyo kuwa maskaxeed ee ay ku yeeshaan dhallinyarada, gaar ahaan xadgudubyada la gula kaco haweenka oo ah kuwo sii kordhaya. Farqiga u dhexeeya doodo-kooxeedyadan ayaa muujinaya in raggu ka xog-ogaalsan yihiin, ama ay rabaan in ay ka hadlaan faragalinta tooska ah ee al-Shabaab, halka ay dumarku u janjeeraan kuwo diiradda saaraya cawaaqibxumooyinka buni'aadantinimo ee ka dhasha colaadaha.

Si kastaba ha ahaatee, guud ahaan 31 kan kaqaybgale, dhowr qof oo keli ah ayaa si toos ah u magacaabay al-Shabaab. Haddaba, tani waxay muujineysaa in iyada oo la ogsoon yahay doorka al-Shabaab ku leeyihiin khilaafaadka Soomaaliya, gaar ahaan kuwa Galmudug, ay haddana kaqaybgalayaashu ka cabsanayaan aargoosi amaba ay walaac ka qabaan suurtagalnimada in xubo al-Shaab ahi ku dhex jiri karaan kooxaha waraysi-kooxeedyada loo qabtay.[29]

Sumcadxumaanta iyo bahalnimada al-Shabaab ee ku suntan ciqaabidda cid kasta oo ka aragti duwan ayaa keentay jawi cabsiyeed iyo in qof kastaaba naftiisa ilaashado, sidaas awgeed waxa laga yaabaa in kaqaybgalayaashu si kutalagal ah ama aan ahayn ay uga fogaanayaan magacaabista al-Shabaab, si ay nafahooda uga badbaadiyaan aargoosiyada suurtagalka ah. Go'aanka cilmibaadhayaasha ee ah in aan si gaar ah loogu degdegin doodaha ku saabsan al-Shabaab, ayaa sida oo kale laga yaaba in ay kaqaybqaataan yaraynta ka hadalka arrinkan. Waxa sidan loo yeelay si looga fogaado in culays loo soo jiido ama cabsi lagu abuuro kaqaybgalayaasha, taas oo laga yaabo in ay saamayn ku yeelatay in ay ka labalabayaan in ay ka hadlaan meesha ay sartu ka quruntay.

## Aragtiyada Dhallinyaradu ka Qabaan Khilaafaadka iyo Nabadaynta

Waraysi-kooxeedyadu waxay muujiyeen fikrado qiimo badan oo ku saabsan aragtiyada ay dhallinyaradu ka qabaan sababaha salka u ah khilaafaadka maxalliga ah, waayo-aragnimadooda shakhsiga ah iyo doorarkooda suurtagalka ah ee nabadaynta. Waxay kaqaybgalayaashu iftiimiyeen in inta badan khilaafaadka gobolkooda ka jiraa salka ku hayaan loollanka qabiillada ka dhexeeya oo ah mid qallafsan, kaas oo uu sii huriyay tartanka loogu jiro kala dhacsiga ilaha khayraadka ee kooban sida dhulka iyo biyaha.

29. SNTV, Sarkaal Danab ahaa oo loo haysto Shirqoollo Halis Argagixisanimo ah, YouTube video, https://www.youtube.com/watch?v=YZEA1NPYl4g "Al Shabaab waxay gudaha u galeen xarumo badan oo dowladeed oo ay ku jiraan laamaha amnigu. Tusaale ahaan, xitaa kamay badbaadin xubnaha sare ee ciidamada kumaandooska Danab, maadaama abaanduulaha ciidankan lagu soo eedeeyay in uu u basaasayay al-Shabaab, taas oo keentay in la dilo dhowr ka mid ah saraakiishii ciidankiisa oo uu ku jiro taliye-kuxigeenkii guutada.

Waxay sharraxeen in ay khilaafaadyadaasi ahaayeen kuwo si maalinle ah oo si qoto-dheer noloshooda ugu lammaan, taas oo si weyn u saamaysa badqabkooda, fursadohooda waxbarasho iyo baraarohooda dhaqaale intaba. Haddaba, fahamkaas kala duwan ee ku saabsan gocoshooyinka taariikhiga ah, dulleysiga siyaasadeed iyo waxqabad la'aanta maamulka dowladnimo ay yihiin waxyaabaha sii kiciya khilaafaadka iyo xasaradaha deegaanka. Tusaale ahaan, kaqaybgale ayaa soo xigtay dhacdo shakhsi ah, taas oo hoosta ka xarriiqaysa dabeecadda saamaynta khilaafaadka ee baaxadda leh : "awoowgey waxa uu ku dhintay colaadaha qabiilka, xitaa aabbihii isla sababtaas ayuu ku dhintay."[30]

Dadkii waraysi-cilmibaariseedka lala yeeshay ee magaalada Dhuusamareeb, waxay shaaca ka qaadeen isqardhaafka baaxadda leh ee ku gadaaman suurtagalnimada kaqaybgalka dhallinyarada ee ku aaddan horumarinta nabadda iyo fursadaha dhabta ah ee u furan. Inkasta oo ay dhallinyarado si cad u danaynayaan kaqaybgalka dadaallada nabadaynta, haddana waxa ay inta badan la kulmaan faquuq iyo culayso ka fiijiyay kaqaybgalka hannaanka go'aan-gaarista rasmiga ah, halkaas oo ay awood ku haystaan jiilasha waa weyn iyo hoggaamiye dhaqameedka qabiilku. Faquuqa dhallinyarada ayaa loo arkaa caqabad culus oo hortaagan in la abuuro xalal nabadeed oo loo dhan yahay kaqaybgalkooda, oo waaritaan leh, kuwaas oo ka jawaabaya baahiyaha bulshada Galmudug, gaar ahaan dhallinyarada.[31]

Jawaabaha laga helay waraysi-kooxeedyadii Dhuusamareeb, ayaa muujinaya in dhallinyarada badankeedu dareensan yihiin muhiimadda ay leedahay in mudnaanta kowaad la siiyo dadaallada nabadaynta ee meelaha miyiga ah, oo laga hor mariyo magaalooyinka. Waxay aamminsan yihiin in dhibaatooyinka gobolka ka jira badankoodu ka soo unkamaan deegaannada miyiga ah, iyaga oo ku baaqay in iskaashi dhow lala sameeyo bulshooyinka maxalliga ah, si wax looga qabto baahiyohooda, loona xoojiyo nabadda. Tusaale ahaan, gabadh kaqaybgalayaasha doodaha ka mid ah ayaa ku baaqday in cilmibaarisyo badan lagu sameeyo goobaha magaalooyinka ka baxsan, iyadoo carrabka ku adkaysay baahida loo qabo in si dhow loo la falgalo dhegeysiga aragtiyaha dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee ay colaaduhu saameeyeen, si markaa aragtiyohooda loogu daro cilmibaarista iyo lafagurka, loona helo faham mug leh oo dhammaystiran.[32]

Sida oo kale, waxa ay kaqaybgalayaashu ku baaqeen in la helo kaqaybgal xooggan oo ay dhallinyaradu ku yeeshaan hannaanka go'aan-gaarista ee la xiriira nabadda. Iyada oo la siinayo madalo iyo fagaareyaal si joogto ah loogu falanqeeyo muhiimadda ay leedahay in dhallinyarada door micno leh laga siiyo dadaallada nabadaynta, ayay kaqaybgalayaashu in badan ku soo celceliyeen.[33]

30. Young man in FGD 2.
31. Mid ka mid ah dhallinyaradii kaqaybgalay dood-kooxeeddii ugu horreysay 'ayaa yiri: "Dhibaatada ugu weyn ee heysata dhallinyarada ku nool Galmudug waa in laga saaro hannaanka go'aan-gaarista. Odayaasha beeluhu dhaqan ahaan waxay haystaan dhammaan awoodda bulshada, taas oo keentay in dhallinyaradu cod la'aan noqoto oo aanay wax awood ah u lahayn inay wax ku soo kordhiyaan."
32. Gabar ka mid ah ka qeybgalayaasha ayaa tiri "Waxaan ku talinayaa in machadka Heritage uu ballaariyo howlaha uu ka wado magaalooyinka, isla markaana uu booqasho ku tago dhulka miyiga ah ee ay saameeyeen colaadaha Galmudug. Iyada oo si firfircoon loo dhegeysanayo dareenka iyo xaaladaha dadka ku nool deegaannadan, waxa aragtidooda lagu ladhi karaa cilmibaaris iyo falanqayn. Habkani wuxuu fahan buuxa ka bixin doonaa caqabadaha iyo xaqiiqooyinka ku xeeran bulshooyinka ay colaaaduhu saameeyeen"
33. Mid ka mid ah haweenkii ka dood-kooxeeddii 3 ayaa tiri: "Dhallinyaradu waa kuwa hurinaya colaadda, haddana waa laga saaray hababka go'aan-gaarista. Dawladdu waxay inta badan la macaamishaa odayaasha, inkasta oo ay dhalinyaradu yihiin kuwa la kulma cawaaqibka colaadda".

Kaqaybgalayaasha daraasadda oo dhammi, rag iyo dumarba waxay ku nuuxnuuxsadeen baahida loo qabo barnaamijyo tababar oo diiradda saaraya xallinta khilaafaadka, dibuheshiisiinta iyo xirfadaha kale ee lama huraanka u ah awoodaynta dhallinyarada, si ay uga qaybnoqdaan hindiseyaasha nabadaynta. Wiil dhallinyaro ah oo ka tirsanaa waraysi-kooxeedkii kowaad ayaa yiri: “si aannu si dhab ah kor ugu qaadno kaalinta dhallinyarada Galmudug, waxaannu u baahanahay hannaan ballaaran oo qaybo badan leh. Hannaankan waxa ku jiri kara in dhallinyarada la siiyo tababarro, maalgelin, fursado hagiseed/jihayneed iyo madalo ay ku soo gubiyaan codkooda ku saabsan geeddi-socodka nabadaynta; si loo maqlo.”[34]

Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay muujiyeen in ay jiraan dhowr urur oo dhallinyaro, kuwaas oo si firfircoon uga shaqeeya nabadaynta iyo dibuheshiisiinta Galmudug. Waxaana ka mid ah: Nabadda iyo Horumarinta Gaalkacayo (Galka’yo Peace and Development), Wakaaladda Nabadda, Shabakadda Dhisayaasha Nabadda ee Gudaha (IPN) iyo xarunta Nabadda ee Elman (Elman Peace).[35] Kooxahaasi waxay iskaashi la leeyihiin Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dibuheshiisiinta iyo hay’addo kale oo dowladeed, waxaanay inta badan diiradda saarayaan wacyigelinta bulshada iyo qabashada barnaamijyo nabadayn ah. Waxqabadyadooda waxaa ka mid ah tababarro, ololeyaal wacyigelineed iyo dood-goleedyo looga golleeyahay in lagu horumariyo nabadda, laguna abaabulo qorshayaal lagu xalliyo khilaafaadka. Si kastaba ha ahaatee, kaqaybgalayaashu waxay xoojiyeen baahida loo qabo taageero dhaqaale, si ay ururradaasi si wax ku ool ah ugu hawlgalaan, una sii xoojiyaan dadaallada dib-u-heshiisiinta. Maalgelin hagaagsani waxay u sahleysaa in ay abaabulaan kulanno, faafiyaan farriimo wacyigelineed, isla markaana ay fududeyaan wadadallo dhex mara qabiillada.[36]

Guud ahaan, kaqaybgalayaashu waxay xoogga saareen baahida loo qabo hab loo dhanyahay, kaas oo aqoonsan in dhallinyaradu kaqaybqaataan geeddisocodka nabadaynta iyo dibuheshiisiinta. Haddaba, awood-siinta dhallinyarada ee dhanka khayraadka/dhaqaalaha, tababarka iyo fursadaha go’aan-gaaristu waxay aad sare ugu qaadi karaan saamaynta ay ku leeyihiin kobcinta nabad waarta oo ka hanaqaadda Galmudug. Habkan oo la jaanqaadaya Qorshe-hawleedka Dibuheshiisiinta Qaran, Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada iyo weliba hannaanada caalamiga ah. Fikradaha nooca jinsiga ku kooban waxay muujiyeen in gabdhahu ay inta badan waajahaan lakabyo dheeri ah oo faquuq ah, taas oo kaqaybgalkooda dadaallada nabadda ka dhigeysa caqabad kale oo siyaado ah. Sida ay gabadh dhallinyaro ah sheegtay: “dumarku waxay noqdeen marba marka ka dambeysa kuwo u nugul arrimahan, iyagoo nasiib darro noqonaya dhibbaneyaasha rabshadaha.”[37] Wax ka qabashada arrimahan jinsiga la xiriira ayaa muhiimad weyn u leh dejinta istaratiijiyado nabadayneed oo dhammaystiran, waxtarna leh.

34. Young man in FGD 1.
35. Ka qaybgalayaasha doodda oo ay ka mid yihiin FGD1YM8, FGD2YM7, FGD2YM2, FGD2YM3, FGD2YW6, FGD2YM5 ayaa xusay ururrada ay ka mid yihiin Elman Peace, Ururka Wakiilada Galmudug, Madasha Wadahadalka Bulshada, Xarunta Dhoon, Peace Building Network, GRD, Hayaan, iyo Wakiilada Nabada.
36. Nin ka mid ah ka qaybgalayaasha dood-kooxeedyada ayaa yidhi: “Dadka da’yarta ahi waxa ay leeyihiin tamar iyo xamaasad ay ku abuuraan isbeddel, laakiin inta badan ma haystaan taageero dhaqaale oo ay ku abaabulaan madalaha, kuna faafiyaan ololayaasha wacyigelinta, ama u safraan sidii ay ula kulmi lahaayeen xubnaha bulshada. Siinta khayraad iyo fursado maalgelineed ayaa dhallimyarada siin kara awood ay ku noqdaan wakiillo firfircoon oo door ku leh nabadda bulshadooda.”
37. FGD 1 female participant.

Qaar badan oo kaqaybgalayaasha doodaha waraysi-kooxeedyada ka mid ahi waxay iftiimiyeen fursado tiro badan oo hadda dhallinyarada u furan si ay uga qaybqaataan horumarinta nabadda iyo xallinta khilaafaadka. Waxay xuseen in qaar badan oo dhallinyaro wax baratay ah ay dib ugu soo laabteen magaalooyinkooda, in ururrada bulshada ka dhex dhisan ay hab sii kordhaya u la falgelayaan dhallinyarada iyo in uu jiro garowshiyo soo kobcaya oo loo hayo muhiimadda in nabad ka jirto dhallinyarada dhexdooda.

Arrimahan waxay ka qaybqaadan karaan in lagu tallaabsado isbeddello togan oo ku saabsanka habfikirka iyo kobcinta dadaallada kaqaybgalka nabadaynta. Intaas waxa dheer, in ay falcelinta kaqaybgalayaashu muujisay in higelinta xalal nabadeed oo waara uu lagama maarmaan u yahay garsoor shaqaynaya iyo aaliyaad fulineed si khilaafaadka qabiilka ku salaysan hab wax ku ool ah loogu xalliyo. Iyadoo maqnaanshaha qodobbadan loo arkayo in ay tahay caqabad weyn oo ku hor gudban xaqiijinta nabad waarta.[38]

# Islaxisaabtanka iyo Caddaaladda Xilliga Kalaguurka: Codadka Dhuusamareeb

Dhallinyarada Dhuusamareeb waxay hoosta ka xarriiqeen kaalinta muhiimka ah ee islaxisaabtanka iyo caddaaladdu ku leeyihiin geeddi-socodka nabadaynta. Marka la eego guud ahaan doodaha waraysi-kooxeedyada iyo weliba waaqica duruufaha deegaan ee Soomaaliya, waxaa cad in dhallinyaradu yihiin dhibbaneyaasha kowaad iyo dembifalayaasha rabshadaha intaba. Kaqaybgalayaasha waraysi-kooxeedyadu waxay si isdaba jog ah ugu soo celceliyeen xaqiiqo ay ku soo noq noqotay hannaanka dibuheshiisiinta qaran iyo siyaasadda qaran ee dhallinyarada labadaba, taas oo ah in kaqaybgalka hababka dibuheshiisiinta ama la xisaabtankooduba waa kuwo markasta la dhayalsado. Tusaale, gabadh dhallinyaro ah ayaa adkaysay in "hab-socodka dibuheshiisiinta hadda jiraa uu iska indho tirayo gaboodfalayaashii uuna ku guul darraystay in uu la xisaabtamo. Waa uun kaabbo-qabiillada cidda matalaysa demi-falaha iyo dhibbanaha labadaba."[39]

Haddaba, meesha ka saaridda arrimahan la tilmaamay waxay ka qaybqaadaneysa gaabiska ka jira wax ka qabashada sababaha xuddunta u ah khilaafaadka, taas oo markaa sii daba-dheerayneysa sii socoshada rabshadaha.

Kaqaybgale kalena wuxuu xusay baahida loo qabo garsoor waxqabad leh iyo aaliyaad fulineed, isagoo ku dooday in "garsoor waxqabad leh iyo hay'ad karti buuxda u leh dhaqangelinta xukunnada ka soo baxa garsoorka ay muhiim u yihiin xallinta khilaafaadka iyo xaqiijinta nabadda ee Galmudug."[40]

38. Haweenay ka mid ahayd dood-kooxeedyada ayaa tiri: "Laba arrimood oo muhiim u ah xallinta khilaafkan waa garsoor wax ku ool ah iyo hay'ad awood u leh fulinta xukunnada ay soo saaraan garsoorku… Wax ka qabashada goldaloolooyinkan ayaa muhiim u ah abuurista shuruudaha lagama maarmaanka u ah hirgelinta nabadda."
39. FGD3 female participant – 5.
40. FGD3 female participant - 3.

Aragtidani waxay waafaqsantahay hababka ugu wanaagsan ee nabadaynta, kuwaas oo u doodaya hirgelinta caddaaladda xilliga kala-guurka ah iyo hannaan garsoor wax ku ool ah maadaama ay lafdhabar u yihiin nabad waarta.[41]

Si kastaba ha ahaatee, dooduhu waxay shaaca ka qaadeen caqabado bulsheed oo baaxad leh, iyadoo ay oday-dhaqameedadu hababka go'aan-gaarista iyaga uun isku koobeen ayna faquuqeen codadka dhallinyarada. Sida nin dhallinyaro ah uu u dhigay: "dhallinyarada inta badan waa laga fogeeyaa kaqaybgalka dhabta ah ee dadaallada dib-u-heshiisiinta. Sidoo kale, aragtiyadooda iyo codadkooda toonna tixgelin ku habboon lama siiyo, taas oo xannibaysa kartidooda si wax ku ool ah uga qaybqaadashada xallinta khilaafaadka."[42]

Faquuqiddaasu ma curyaamiso oo suurtagalnimada kaqaybgalkooda oo kali ah balse waxay kaloo mijaxabisaa awoodoodda waayo-aragnimada tooska ah iyo aragtiyadooda ee ku aaddan khilaafaadka. Daraasadaha ku saabsan caddaaladda xilliga kala-guurka ah waxay xoojineysaa walaacan, iyagoo sii adkayay in sida kali ah ee nabad waarta lagu gaari karo ay tahay marka bulshooyinku ay raacaan habka dib-u-habaynta dhammayskatiran, kaasoo xal u raadinaya sababaha xuddunta u ah dhibka isla markaana ay caddaalad marsiiyaan xadgudubyadii hore.[43]

Si taas la mid ah, Xarunta Caalamiga ah ee Caddaaladda Xilliga Kala-Guurka ah (International Centre for Transitional Justice) waxay daaha ka qaaday in aaliyaadka caddaaladda xilliga kala-guurka ah ee guulaystay ay yihiin kuwa duruufta waaqicooda ka tarjumaya isla markaana ay ka qaybqaataan si guud dadweynuhu, gaar ahaanna qaybaha la dayacay ee bulshada.[44] Ka maqnaanshaha dhallinyarada ee hababka go'aan-gaarista ee Galmudug waxay hoosta ka xarriiqaysaa muhiimadda ay leeyihiin hannaanadan loo dhanyahay.

Dr. Laura Davis maqaalkeedii ay ku qortay Xarunta Reer Yurub ee Maaraynta Siyaasadaha Horumarinta (ECDPM), cinwaankiisuna ahaa: Kaalinta Caddaaladda ee Nabadaynta :

> **Casharrada laga bartay Caddaaladda Xilliga Kala-Guurka ah, waxay ku sheegtay: in kastoo hindiseyaasha caddaaladda xilliga kala-guurka ah inta badan loo qorsheeyo loona dejiyo hab deg deg ah, haddana kaqaybqaadashada dadweynaha iyo in lagala tashado dhanka ujeeddooyinka, baaxadda, masuuliyadda iyo qaabaynta hindiseyaashasi waa mid lama hurraan ah, si loo helo aqbalidda dadweynaha, kalsoonidooda iyo sharciyad ba.**

41. United Nations, "Peacebuilding, Sustaining Peace and Transitional Justice," 2020, UN Thematic Paper, https://www.un.org/peacebuilding/sites/www.un.org.peacebuilding/files/4._ohchr_thematic_paper_on_transitional_justice.pdf
42. FGD3 male participant - 9
43. Qaramada Midoobay, Nabadaynta, Nabadda Joogtada ah iyo Caddaaladda Kumeelgaarka ah, b. 4. "Caddaaladda ku meelgaadhka ahi waxay muhiim u tahay kaalmaynta bulshooyinka iyo in dawladuhu si habboon wax uga qabtaan wixii hore. Waxay ka caawisaa dibudhiska xiriirrada burburay,dibuhabaynta iyo awoodaynta bulshooyinka ay saamaysay, iyo ka hortagga soo noqoshada xadgudubyada. Marka sidaas la sameeyo, waa lagama maarmaan in la xaqiijiyo nabad waarta. P.4..
44. United Nations Office of the High Commissioner for Human Rights (OHCHR), "Transitional Justice and Human Rights," accessed December 23, 2024, https://www.ohchr.org/en/transitional-justice

> **Sidoo kale, waxaa muhiim noqon kara in dadaallo gaar ah la sameeyo si loo hubiyo in aragiyada iyo baahiyaha qaybaha la dayacay ee bulshada xisaabta lagu darsaday oo la tixgeliyay. Haddaba, hababka ku guul darraysta in ay ka jawaabaan kala duwanaanshaha waayo-aragnimada ee ragga iyo dumarka iyo weliba qaybaha gaarka ah ee bulshadu waxay khatar ugu jiraan in ay sii xoojiyaan rabshadaha qaabdhismeedka la xiriira halkii ay ka yarayn lahaayeen, waxaana macquul ah in ay kasii qaybqaataan sii fogeeynta kala qaybsanaanta ama rabshadaha ee mustaqbalka.**[45]

Halista ugu weyn ee nabadda Dhuusamareeb haysataa waa dilalka aanada iyo aargoosiga ku salaysan, xattaa haddii aanu dhibbanuhu wax ku lug lahaansho toos ah ama mid dadban toonna ku lahayn colaadihii horay u dhacay oo aan ka ahayn in uu qabiilkaas uun ka soo jeedo. Nin ka qaybgalayaasha waraysi-kooxeedkii 3aad ka tirsan ayaa si faahfaahsan u sharraxay cidda ay rabshadaha iyo aargoosigu sida taban u saameeyaan iyo sida ay u walbahaar geliyaan dhallinyarada Dhuusamareeb, isgoo sheegay:

> **Cabsida laga qabo aanaysi iyo aargoosi beeleed waa mid si joogto ah ugu lammaan nolosha dhallinyarada gobolka. Halka markastoo hal qof oo qabiil ka tirsan la dilo, waxaa jirta cabsi qabiilka qofka wax dilay ku duugan oo qof kastoo ka mid ahi filanayo in uu isaguna kan xiga noqon karo. Haddaba, waa uun dhallinyarada cidda mar kaqaybqaadata falalka dilka marna ku nool cabsi joogto ah oo ay ka qabaan in iyaga la beegsado. Waxaa wax laga murugoodo ah in dhallinyaro badan ay dhibbane u noqdeen dilal qorshaysan oo lagu fuliyay magaca haybta qabiil, iyadoo dhallinyaradaasi aaney waxba galabsan cidnana aaney dilin.**

Iyadoo magaalooyinka waa weyn sida Muqdisho ay dadku ka cabsadaan joogitaanka al-Shabaab, haseyeeshee goobaha qaar sida Dhuusamareeb, cabsida ugu badani waa mid ku salaysan colaad qabiillada dhexdooda ah. Dhallinyarada iyaguna way ishubayaan si ay isu difaacaan, iyagoo og in dilalka aanada ka tirsanaanta magaca beeleed ku dhisan ay yihiin halis dhab ah oo marwalba loo joogo.

Sida ay digaalladu xoojinayaan, haddii aan dejin hab caddaalad xilliga kala-guurka ah oo wax ka qabaneysa gabood falladii horay u dhacay, nabad-dhisid iyo nabad waarta midna suurtagal ma noqonayo, sidoo kalena dhallinyaradu ammaan ma dareemayaan ama hab wax ku ool ah ugama qaybqaadanayaan nabadaynta iyo u booga dhayidda bulshada.

Doodihii waraysi-kooxeedyada ee Dhuusamareeb waxay tooshka ku ifiyeen baahida weyn ee loo qabo hannaan laga wada qaybqaato ee nabadaynta ee Galmudug, kaas oo dhallinyarada si firfircoon uga qaybgelinaya hababka islaxisaabtanka isla markaana awoodda siinaya aaliyaadka caddaaladda xilliga kala-guurka ah si dib loogu dhiso kalsoonida.

45. ECDPM, "The Role of Justice in Peacebuilding: Lessons from Transitional Justice," accessed December 23, 2024, https://ecdpm.org/work/peacebuilding-and-statebuilding-volume-4-issue-1-december-2014-january-2015/the-role-of-justice-in-peacebuilding-lessons-from-transitional-justice

Gabadh kaqaybgalayaasha waraysi-kooxeedkii 3aad ka tirsan ayaa sharaxday caqabadaha iyo fursadaha ka jira Galmudug iyo sida dhallinyaradu u noqon karaan dirsaneyaasha isbedeellka:

> **"Dhallinyaradu waxay leeyihiin awood aan la ankiri Karin iyo cod aan cidna aamusin karin. Marka haddii ay isu yimaadaan oo urur ay u dhanyihiin wada samaystaan kasoo leh hiigsi cad, fikradohooda iyo codadka waxay heli lahaayeen qaddarinta ay mudanyihiin. Balse hadda dhalinyaradu waa qaybsanyihiin, sidaas darteedna, fikradaha shakhsiyaadkoodu waa kuwo aan inta badan la dareemin lana dhegeeysan. Haseyeeshee, marka ay midoobaan oo soo gudbiyaan mawqif midaysan, dhallinyaradu waxay si weyn uga qaybqaadan karaan xallinta khilaafaadka ee gobolka."[46]**

# Saamaynta Qofeed ee Colaadaha Beeleed Ku Leeyihiin Dhallinyarada

Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay sawir cad ka bixiyeen sida colaadaha beeleed ee Galmudug ka dhacaa si qotto-dheer ugu saameeyeen dhallinyarada, iyagoo u xambaariya/ tiiriya culaabta tiiraanyo jireed iyo mid dareen oo daran. Dhallinyarada waxay is arkaan iyagoo safka hore kaga jira rabshadaha. Mid kaqaybgalayaasha ka mid ah ayaa xusay: "dhallinyarada waxaa ku dhaca culayska ugu badan ee colaadaha, iyagoo inta badan naftooda ku waaya dirirta dhexdeeda.[47]

Khasaaraha caadifadeed/ dhanka dareenka ahi waa mid culus, maadaama saaxiibbo iyo bulshooyin wada dhaqnaa kala irdhoobeen, dumarkuna waxay la kulmaan khataro kaloo rabshado ah, kuwaa soo uu ka mid yahay kufsi.[48] Barakacu waa arrin kaloo ka mid ah cawaaqibta xun ee ay ka simanyihiin colaadahaasi. Iyadoo dhallinyaro badan lagu khasbay in ay ka qaxaan guryohoodii, iyagoo taasi ku kaliftay in ay wajahaan nolol cakiran iyo mustaqbal mugdi ah. Waxayna la kulmaan takoorid ku salaysan haybtooda qabiil, xattaa marka ay u baahanyihiin daryeel caafimaad. Nin dhallinyaro ah ayaa yiri: "dhallinyarada waxaa lagu khasbay in ay ka barakacaan, iyagoo aan haysan meel ay ku noolaadaan."[49] Haddaba, barakacaas oo ay weheliyaan xiritaanka iskuullada iyo ganacsiga oo albaabada laysku dhufto ayaa sii sal-kiciya noloshooda; iyadoo nidaamyada/hab-dhismeedyada buksheed sidoo kale si ba'an u khalkalaan.

Colaadaha qabaliga ahi waxay burburin karaan xiriirrada, iyadoo waayeelku diidaan guur dhex mara qabiillada kala duwan. Dumarku waxay qaataan masuuliyad kaloo dheeri ah maadaama raggu ay ka baxsanayaan rabshadaha.

46. Female participant, FGD 3.
47. FGD1: "Dhallinyaradu waxay colaadaha kala kulmaan culeyska ugu daran, iyaga oo inta badan naftooda ku waaya dagaallada. Inkasta oo ay odayaashu aysan si toos ah u joogin jiidaha hore ee dagaalka, qaar ka mid ah ayaa aamminsan in ficilladoodu ka qaybqaataan bilawga colaadahaas. Sida oo kale, dumarku aad bay u ugu nugul yihiin colaadaha, waxaanay noqdaan dhibbanayaasha uu halaagga ugu weyni cuskado."
48. Haweeney ka mid ah kaqeybgalayaasha ayaa tiri: "Dhallinyaro ahaan, waxaan caddeyn karaa in isku dhacyadani leeyihiin saameyno jireed iyo maskaxeed oo qotadheer. Waa arrin aad looga xumaado in la arko dhallinyaro naftooda ku wayday murannada ku salaysan kheyraadka sida biyaha iyo dhulka. Dagaalladu waxa ay sidoo kale keeneen in ay kor u kacaan kiisaska xadgudubyada ee la xiriira jinsiga, iyada oo gabdho badan ay kufsadeen maleeshiyo beeleedyo hubaysan oo ka faa'iidaysta colaad beeleedyo."
49. A female participant from FGD1.

Dhaqaale ahaan, dhallinyaro badan ayaa awoodi waaya in ay sii wadaan shaqooyinka amaba waxbarashada. Kaqaybgale ayaa xusay in "marka ay colaaduhu dhacaan, ay dhallinyaradu ka qaxi jireen deegaannadooda."[50] Sidoo kale, la'aanta fursado waxbarasho waxay sii daba-dheerayneysa sii socoshada colaadaha, maadaama dhallinyarada aan waxba baran ay u badantahay in ay ku biiraan rabshadaha.[51] Nafsi ahaan, saamaynta colaadahu ku leeyihiin dhallinyarada waa mid aad u weyn. Tusaale, cabsida joogtada ah ee laga qabo aano/aargoosi iyo tiiraanyada ka dhalata qofka oo waayay dadkii uu jeclaa waxay ku reebaan dhaawacyo aan la dhayi karin. Nin dhallinyaro ah oo kaqaybgalayaasha ka mid ah ayaa isagana xusay: "colaadaha ka dhaca Galmudug waxay saamayn ba'an ku leeyihiin dhallinyarada."[52] Haddaba, tiiraanyadan waxaa uga sii daray ka faquuqidda hababka xallinta khilaafaadka, taas oo ku ridey dareen rajo la'aan ah.

Falanqaynta nooca jinsiga ayaa muujisay kala duwanaansho weyn ah oo u dhexeeya sida ragga iyo haweenku u kala arkaan, ula na kala noolaadaan saamaynta colaadaha qabaliga ah. Dhallinyarada ragga ahi inta badan waxay ka hadlaan kaqaybgalkooda tooska ah ee dirirta iyo khataraha dhaawacya jireed ee ay la kulmaan. Tusaale ahaan, kaqaybgale ayaa sheegay: "marka kowaad, dadka dagaalamaya waa uun dhallinyaro, badanaa dadka waa weyni isma dilaan."[53] Tani waxay hoosta ka xarriiqaysaa filashadii laga qabey in dhallinyarada ragga ahi ay kaqaybgalaan iska horimaadyada rabshadaha wata, taas oo kaqaybqaadata tiiraanyadooda jireed iyo midda nafsi ahaaneedba.

Taas lidkeeda, dhallinyarada dumarka ahi waxay si joogto ah xoogga u saaraan saamaynta aan tooska ahayn ee colaadaha balse sida taas hore u waxyeellada culus. Waxay tilmaameen masuuliyadaha dheeriga ah ee ay qaadeen iyo welwelka joogtada ah ee ay ka qabaan badqabka ragga qaraabadooda ah. Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa yiri: "dumarka iyo raggu isku mid maaha marka ay timaado waajihidda dhibbaatooyinkaas, dumarku dhankooda kama welwelaan oo kuma fikiraan arrintii waa xumaatay ama adigaa lagu dilaa, balse gabadhu waxay aano iyo aargoosi amaa loo dilaa uga cabsataa walaalkeed, aabeheed iyo ninkeeda."[54] Intaas waxa dheer, waxaa sare u kaca rabshadaha jinsiga ku salaysan inta ay socdaan colaaduhu, taasoo nugaylka haweenka sii kordhisa. Natiijooyinka laga helay doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay waafaqsanyihiin si guud digaallada ku saabsan saamaynta ay colaaduhu ku leeyihiin dhallinyarada.

50. A female participant from FGD 2.
51. Kaqaybgalayaashii doodda ayaa yiri: "Dhallinyarada ayaa kaalin muuqata ku leh colaadaha, waxaana sabab u ah waxbarasho la'aanta ka jirta gobolka. Shaqsiyaadka aan aqoonta lahayn ayaa inta badan isku arka in ay colaadaha ugu milmaan si aan ku talagal ahayn, waxaanay caqabado kala kulmaan in ay si nabad ah u xalliyaan colaadaha."
52. Male, FGD 3 participant.
53. Male, FGD2 participant.
54. Female, FGD 2 participant.

Daraasaduhu waxay si isku mid ah shaaca uga qaadayaan in dhallinyaradu in ka badan qaybaha kaloo dhan ay rabshaduhu saameeyaan, iyagoo la kulma jaahwareerro adag dhanka waxbarashada, degenaanshaha dhaqaale iyo weliba caafimaadkooda nafsiga ah.

Tusaale, warbixinta Bangiga Adduunka oo cinwaankeedu yahay Dhallinyarada waa Dirsaneyaasha Nabadda ee Soomaaliya wuxuu sheegay: "Sanadkii 2016 dii oo qur ah, waxaa la soo gudbiyay in ay dhaceen toddoba kun iyo labo boqol oo kiis oo ah tacaddiyada jinsiga ku salaysan (GBV). Marka la eego xaqiiqada ah in tacaddiyada jinsiga ku salaysani ay ka simanyihiin in aan sida saxda ah loo soo wada werin/gudbin dunida oo dhan, gaar ahaanna goobaha colaaduhu ka jiraan, waxay u badantahay in tiradani tahay qayb yar oo ka mid ah tacaddiyada jinsiga ku salaysan ee Soomaaliya ka dhaca."[55]

Warbixinnada Qaramada Midoobey (UN) sidoo kale waxay xoojinayaan sida loogu baahanyahay hannnaan nabadeed oo laga wada qaybqaato kaas oo ay dhallinyaradu si firfircoon uga qaybqaadato, iyadoo la qirayo aragtiyohooda iyo waayo-aragnimadooda gaarka ah. Warbixinnadani waxay lafagurayaan dhallinyarada Soomaaliyeed oo, in kastoo ay waajahayaan rabshado, noqday kuwa calanka u sida nabadaynta , sida Abdiqani Osman Yusuf oo kale:

> **"Abdiqani Osman Yusuf waa nin dhallinyaro ah oo goob joog u ahaa oo indhihiisa ku arkay foolxumooyinkii dagaalka. Isagoo ku dhashay dhulka miyiga ah ee Puntland, wuxuu goob joog u ahaa rabshado, barakac iyo dilal isagoo ilmo ah. Wuxuu waxbarasho u soo doontay magaalada Galkacayo, taas oo ay dad badani ku naf waayeen. Balse Abdiqani marna isma dhiibin oo riyadii uu dalkiisa ka lahaa kama harin. Wuxuu sii watay waxbarashadiisa wuxuuna ka qalinjebiyay Jaamacadda Galkayo Puntland State University isagoo shahaadada kowaad ka qaatay cilmiga dhaqaalaha. Wuxuu kaloo go'aansaday in uu naftiisa u hibeeyo nabadaynta iyo la falgalka dhallinyarada, isagoo aaminsan in dhallinyaradu ay awoodaan in ay isbeddel wanaagsan u sameeyaan mustaqbalkooda. Abdiqani wuxuu aasaasay Xarunta Nabadaynta iyo La-falgalka Dhallinyarada Mudug (Peacebuilding and Youth Engagement Center of Mudug), taas oo ah urur dhallinyaro hoggaamiso oo ka shaqeeya horumarinta wadahadalka iyo dibuheshiisiinta dhallinyarada dhexdooda ee ka kala socda labada dhinac ee khilaafka. Wuxuu kaloo hibadiisa waxqorista u adeegsadaa si uu farriimo togan oo nabadda ku saabsan ugu faafiyo madallaha baraha bulshada.**[56]

55. World Bank, Youth as Agents of Peace Somalia, April 2018, P.28, https://documents1.worldbank.org/curated/en/463921526414702925/pdf/126251-WP-P152600-PUBLIC-Youth-As-Agents-of-Peace-Somalia.pdf
56. United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM), "Somali Youth: The Voices of Peace and Hope," August 3, 2023, https://unsom.unmissions.org/somali-youth-voices-peace-and-hope

# Aragtiyaha Bulshadu ka Qabto Kaqaybgalka Dhallinyarada ee Nabadaynta

Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay muujiyeen aragtiyaha ay bulshadu ka qabto kaqaybgalka dhallinyarada ee dadaallada nabadaynta  ee Galmudug ay yihiin kuwo kala gedisan oo isku dhafan, kuwaas oo ka tarjumaya aragtiyo arrintan  taageersan iyo kuwo iska indho tiraya intaba. Hannaanka Dibuheshiisiinta Qaran iyo Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada labaduba waxay u qareemayaan ka qaybggelinta dhallinyarada ee nabadaynta, kaqaybgalayaasha waraysi-kooxeedyaduna isla dareenkan ayeey cabbireen. Tusaale ahaan, gabadh dhallinyaro ah ayaa xustay: “dad badan oo soomaali ah ayaa u arka kaqaybgalka dhallinyarada ee dadaallada dibuheshiisiinta in ay tahay horukac wanaagsan.[57] Sidaas si la mid ah, nin dhallinyaro ah ayaa sheegay: “bulshada soomaaliyeed waxay dhallinyarada u aragtaa in ay lafdhabar u yihiin daminta colaadaha. Goobjoognimadooda kaqaybgalka dadaallada dibuheshiisiinta waxaa loo arkaa tallaabo qumman oo dhanka wanaagsan loo qaaday.”[58]

Oraahyadaasi waxay muujinayaan in odayaasha qaarkood ay aqoonsanyihiin suurtagalnimada ka qaybqaadashada dhallinyarada sidii  meesha looga saari lahaa rabshadaha loona adkayn lahaa nabadda.

Si kastaba ha ahaayee, dooduhu waxay sidoo kale soo shaac bixiyeen caqabado bulsheed iyo dhaqameed oo waa weyn, kuwaas oo ku hor gudban kaqaybgal shallinyaro oo macno leh. Hababka dhaqameed ee qadiimiga ah iyo isku koobidda odayaasha ee arrimahan ayaa dhallinyarada ka fogeeyay geeddi-socodyada nabadda.[59] Nin dhallinyaro ah ayaa iftiimiyay arrintan, isagoo yiri: “marka la eego bulshadeenna, dhaqankeenna ayaa go’aamiya cidda ay tahay in ay ka qaybqaadata marka laga hadlayo kaqaybgalka dhallinyarada ee xallinta isku dhacyadaa beelaha. Odayaashu waxay dhallinyarada ku oranayaan: ‘ma awoodi kartaan in aad xallisaan arrintan, waayo waxad dhalateen xilligii colaadaha, sidaas darteed, wax fikrad ah kama haysataan in aad wax kaqaybgashaan haba yaraate.”[60] Arrintani waxay ka tarjumeysaa diidmo dhaqameed oo hortaagan kaqaybgalka, halka odayaasha uun loo arko in ay yihiin dhex dhexaadiyaasha aasaasiga ah ee nabadda,[61] sidaasna waxaa lagu qiimo tirayaa kaqaybqaadashada jiilasha yar yar.

57. FGD 1.
58. Ibid.
59. Cabdicasiis Abuukar Axmed. Kaqaybgalka Dhallinyarada ee Nabadaynta Soomaaliya: Caqabadaha iyo Fursadaha. Horseed International University. “Fashilka Dowladda iyo fikradaha gaar u soocidda ayaa loo tixgaliyaa in ay horseed u yihiin rabshadaha xagjirnimada ah ee ay ku kacaan dhallinyarada Soomaaliya.” P. 131.
60. FGD 2.
61. Haweenay dhallinyaro ah oo ka mid ah koox-doodeeddii kowaad, ayaa ku dartay in ay heshiisyo aan rasmi ahayn dhexmaraan odayada, “ha u horseedin xalal waaritaan leh.”

Qaar ka mid ah kaqaybgalayaasha doodaha waraysi-kooxeedyada ayaa tilmaamay in dadaalladooda ku aaddan nabadaynta aan la aqoonsan lana tixgelin. Kaqaybgale gabadh ah ayaa tiri: "runtii waa niyadjab in aad dareento in inta ugu badan dadku ay u janjeeraan in ay u arkaan dhallinyarada hawlaha nabadda ka shaqayneysa qaab qaldan/taban. In kastoo ay xaqiiqadu tahay in dhallinyaradu ay yihiin kuwa sida firfircoon ugu halgamaya nabadda, haddana inta badan waxay la kulmaan shaki laga qabo iyo iska caabbin.[62] Haddaba, shaki gelintaas waxaa garab socda aaminsanaanta in shakhsiyaadka ku hawllan nabadaynta laga yaabo in loo arko kuwo ka macaashaya khilaafaadka halkii looga arki lahaa dad si daacad ah uga shaqaynaya gaarista xalka.

Sidoo kale, daraasadihii hore waxay xoojiyeen natiijooyinka daraasadda, iyagoo hoosta ka wada xarriiqay in ay dhallinyarada suurtagal u tahay in ay kaalin isbeddel weyn horseedda ka galaan nabadaynta , balse inta badan waxay la kulmaan jid gooyooyin qorshaysan kuwaas oo xaddida waxqabadkooda. Daraasaduhu waxay caddeeyeen in kaqaybgalka dhallinyaradu uu muhiim u yahay gaarista nabad waarta, haseyeeshee weli kaqaybqaadashadoodu waa mid ay si joogto ah u dhayalsadaan habdhismeedyada awoodda ee soo jireenka ahi, iyagoo mudnaanta siiya talinta waayeelka.

Daraasad ay fulisay Xarunta Geeska (Horn Centre), oo ah xarun cilmibaariseed oo fadhigeedu yahay Dhuusamareeb, oo cinwaankeedu yahay: Sahminta Seeska Nabadda ee Dowladda Goboleedka Galmudug ee Soomaaliya, ayaa sheegtay: "Habka xulashada iyo magacaabista ee hadda jiraa wuxuu ku guul darraystay in uu dhallinyarada, haweenka iyo qaybaha la faquuqay kaqaybgeliyo xubinnimada golayaasha."[63] Sidoo kale, warbixinnada Bangiga Adduunka iyo Qaramada Midoobey waxay hoosta ka xarriiqeen baahida loo qabo in la helo habab laga wada qaybqaato, kuwaas oo aqoonsan kana faa'iideynaya aragtiyada iyo tamarta gaarka ah ee dhallinyarada. Haddaba, si wax looga qabto caqabadahaas, kobcinta  isbeddel dhaqameed oo qaddarinaya kaqaybqaadashada dhallinyaradu waa lagama maarmaan. Taas micneheedu maaha in la beddelo aragtiyaha bulsheed oo keli ah balse sidoo kale waa in la abuuraa aaliyaad/qorshe hay'adeed si loo xaqiijiyo kaqaybgalka. In la sameeyo golayaasha la talinta dhallinyarada ee dhammaan heer federal, dowlad goboleed iyo degmo ba, laguna dhex daro hay'adaha go'aan-gaarista matalayaal dhallinyarada ka socda waxay dhallinyarada siin kartaa madalo ay ku soo gudbiyaan aragtiyahooda ayna si firfircoon ugaga qaybqaataan qaabaynta nabadda iyo arrimaha kale ee la xiriira maamulka dowladdaa iyo sida oo kale waajibaadka bulshooyinkooda ka saaran.

62. FGD 3.
63. Horn Centre, Mapping the Foundations of Peace in Galmudug State, Somalia, June 2023, 74, https://horncenter.so/wp-content/uploads/2024/04/REPORT-IN-GALMUDUG-STATE-2023-V4-1.pdf. The report also quotes a focus group discussant in Guriel: "A female participant decried the persistent exclusion of women in local governance structures, noting that women do not have a significant role in the local governance institutions due to the male bias that men should always be given priority and elders always monopolize seats to males. They disregard women's role in peacebuilding and social cohesion."

# Caqabadaha Hortaagan Kaqaybgalka Dhallinyarada ee Nabadaynta

Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay muujiyeen caqabado tiro badan oo ku hor gudban kaqaybgal wax ku ool ah oo ay dhallinyaradu ku yeeshaan geeddi-socodyada nabadaynta. Caqabadahaas, oo si qotto-dheer ugu duugan dhaqdhaqaaqa habdhisyada dhaqan-bulsheed, waxay daaha ka feydayaan caqabadaha ay wajahaan dhallinyarada ragga iyo dumarkaba ah si ay uga qaybqaataan dadaallada dib-u-heshiisiinta. Mawduuca kale ee ugu badan oo laga wada midaysnaa dhammaan doodaha wuxuu ahaa caqabadaha dhaqaale ee haysta dhallinyarada.

Sida ku cad daraasad uu Machadka Daraasaadka Siyaasaadka ee Heritage (HIPS) sameeyay sanadkii 2022 dii oo cinwaankeedu yahay: Shaqo La'aanta Dhallinyarada iyo Amniga: "Ugu yaraan boqolkiiba 70 dhallinyarada Soomaaliyeed ee kaqaybgalay sahminta waxay ahaayeen shaqo la'aan. Marka la eego kaqaybgalayaasha daraasadda, shaqo la'aantu waxay ku badnayd haweenka dhallinyarada ah."[64]

In kastoo dhallinyaradu leeyihiin doonis iyo tamar ay ku dhaqaajiyaan hindiseyaasha sida nabadaynta, haddana inta badan waxay la'yihiin maaggelinta ay u baahanyihiin si ay u abaabulaan kulamo, u faafiyaan ololeyaal wacyigelin amaba u socdaalaan si ay u la falgalaan bulshooyinkooda. Gabadh kaqaybgalayaasha ka mid ah ayaa qodobkan xoojisay: "In dhaqaale iyo maalgelin la siiyo waxay dhallinyarada awood u siin kartaa in ay noqdaan u qaybsanyaasha nabadda ee bulshooyinkooda."[65] Tani waxay hoosta ka xariiqaysaa baahida loo qabo in la helo barnaamijyo awood-siin dhaqaale kuwaas oo bixiya taageero maaliyadeed iyo tababarro xirfadeed, si dhallinyarada loogu garab siiyo in ay hab wanaagsan uga qaybqaataan arrimaha bulshooyinkooda, taas oo sidoo kale ah arrin ay Siyaasadda Qaran ee Dhallinyaradu u doodeysay.[66]

Qaabdhismeedka qadiimiga/soo jireenka ah ee maamulka Galmudug, oo ay gacanta sare leeyihiin hoggaanka oday dhaqameedka, ayaa isaguna si weyn xaddidaya kaqaybgalka dhallinyarada. Qaar badan oo kaqaybgalayaasha daraasadda ka mid ah ayaa carrabka ku adkayey in ay odayaashu awoodda hababka go'aan-gaarista oo dhan qaateen, iyagoo dhallinyarada ka dhigay kuwo aan codkooda la maqal aanna awoodin kaqabqaadasho waxtar leh. Faquuqiddan waxaa garab socda caado dhaqameedyo mudnaanta siinaya talada/xukunka odayaasha isla markaana liidaya kaqaybgalka xubnaha da'da yar ee bulshada, gaar ahaanna dumarka. Gabadh dhallinyaro ah ayaa iftiimisay: "Gabdhuhu gebi ahaanba waa ka maqan yihiin shirarka, taas oo ah arrin muhiim ah."[67] Haddaba, faquuqan dhanka jinsiga la xiriiraa wuxuu sii wiiqayaa kaalimaha ay dhallinyarada iyo haweenku ku leeyihiin arrimaha danta guud waxayna sii daba-dheerayneysaa giraanta faquuqidda.

64. Heritage Institute for Policy Studies. Youth Unemployment and Security: Prioritizing Jobs for Achieving Stability. April 2022. Accessed at: https://heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2022/04/Final-Final-Youth-Unemployment-Report-April-10-English-Version.pdf
65. FGD1 participant.
66. UNFPA, The National Youth Policy of The Federal Government of Somalia, March 17, 2018, https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/UNFPA%20Somalia%20National%20Youth%20Policy%20Eng%20fa.pdf.
67. Female participant, FGD 2.

Muuqaalka siyaasadeed ee Galmudug wuxuu inta badan mudnaanta siiyaa taageerada iyo maalgelinta hindiseyaasha ay hoggaaminayaan odayaashu wuxuuna xagal daaciyaa dadaallada ay dhallinyaradu hormuudka u yihiin. Intaas waxa dheer, aragtidada dhallinyarada laga qabo oo ah in ay dhibka qayb ka yihiin, halkay xalka ka ahaan lahaayeen, ayaa ayaduna sii xannibeysa kaqaybgalkooda. Kaqaybgale ayaa xusay: "Dhallinyarada inta badan waxa loo arkaa in ay dhibaatada qayb ka yihiin oo aaney xalka qayb ka ahayn." Aragtidan taban, oo ay weheliso kalsooni darro ay dhallinyaradu ku qabaan awoodda ay u leeyihiin ka jawaabidda caqabadaha jira, ayaa sii xaddiday kaqaybgalkooda.

# Iskaashiga Dhallinyarada Kala Dhexeeya Ururrada Nabadaynta

Intii lagu guda jirey doodaha waraysi-kooxeedyada waxa la tilmaamay ururro dhowr ah oo si firfircoon dhallinyarada ugala shaqeeya hindiseyaasha nabadda, kuwaas oo ay ka mid yihiin Xarunta Nabadda ee Elman (Elman Peace) iyo Guddiga Caalamiga ah ee Badbaadada (IRC), kuwaas oo tababar iyo taakulo farsamo ku bixiya kaqaybgalka dhallinyarada, gaar ahaanna goobaha magaalooyinka ah. Waraysi-kooxeedyadu waxay sidoo kale shaaca ka qaadeen ururro kale, sida Ururka Wakiilada Galmudug, Hayaan, Madasha Wadahadalka Bulshada, GRD iyo Doon Center, kuwaas oo iskaashi la leh Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Arrimaha Haweenka, iyo Gudaha iyo Dibuheshiisiinta, si ay u qabtaan ololeyaal wacyigelin iyo hindiseyaal kale oo khuseeya muhiimadda nabadda.[68] Haddaba, hindiseyaashani waxay hoosta ka xarriiqayaan doorka muhiimka ah ee ay dhallinyaradu ka qaataan faafinta dhambaallada nabadda iyo xoojinta dib-u-heshiisiinta.

Ururka Hayaan, oo asagu si gaar ah ula shaqeeya gabdhaha iskaashina la leh Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka, wuxuu tusaale cad u yahay dadaallada nabad-dhisidda ee haweenka diiradda saaraya. Shaqadeedu waxay bidhaamisaa baahida loo qabo in gabdhaha laga qaybgeliyo geeddi-socodka nabadaynta , iyadoo isla markaana laga jawaabayo caqabadaha u gaarka ah ee ay la kulmaan.[69]

In kastoo tusaaleyaashaas wanaagsani jiraan, haddana tiro caqabado ah ayaan weli xal loo helin. Doodaha waraysi-kooxeedyadu waxay muujiyeen in qaar badan oo hay'adahaas ka mid ahi ay badanaa ka hawlgalaan goobaha magaalada ah, iyagoo deegaannada miyiga ah iska indho tiray. Sinnaan la'aantan magaalada iyo miyiga u dhexeysaa waxay xaddideysaa baahinta hindiseyaasha nabadda, waxayna ka dhigeysaa tiro badan oo bulshada dhallinyarada ah ka mid ah kuwo aan adeeg helin, gaar ahaan bulshooyinka ku dhaqan dhulalka miyiga ah oo ah meelaha colaaduhu ka aloosmaan.

68. Discussants in all three FGDs mentioned these organizations.
69. Female participant, FGD 2.

# Gunaanad

Guud ahaan, waraysi-kooxeedyadii iyo lafagurkii ku saabsanaa kaqaybgalka dhallinyarada ee dadaallada nabadaynta ee Galmudug, ayaa muujinaya xaalado isku dhafan oo ay ku xeeran yihiin caqabado iyo fursado isku lammaani. Fikradaha laga soo dhiraandhirriyay waraysi-kooxeedyada (FGDs) iyo dibu-eegisaha lagu sameeyay daraasdihii hore iyo siyaasadaha dowladda iyo qorshe-hawleedyada caalamiga ah iyo kuwa gobolkaba waxay dhammaantood hoosta ka xarriiqeen caqabadaha waaweyn ee dhallinyarada ka hortaagan in ay si buuxda uga qaybqaataan hannaanka nabadaynta, kuwaas oo ay ka mid yihiin caqabado dhaqaale, hab-dhismeedka gaboobey ee maamulka dowladda iyo aragtiyaha bulsheed oo ah nidaamyo guun ah oo inta badan faquuqa dhallinyarada, siiba haweenka. In kasta oo ay caqabadahaasi jiraan, haddana waxaa jira rabitaan xooggan oo ay dhallinyaradu u hayaan kaqybqaataan geeddisocodka nabadda iyo dibuheshiisiinta, waxaana taas markhaati u ah iskaashiga ay la sameeyeen ururrada kala duwan iyo sida ay ugu ololeynayaan in ay door weyn ku yeeshaan kaqaybgalka hannaannada go'aan-gaarista.

Dooduhu waxay shaaca ka qaadeen xaddiga baaxadda khilaafaadka Galmudug, iyada oo la qirsan yahay saamaynta taban ee al-Shabaab ku leedahay arrimaha colaadda, haddana aan inta badan si cad looga ma hadlo, sababo u badan cabsi laga qabo aargoosiga kooxda. Kala duwanaanshaha aragtiyaha kaqaybgalayaasha labka iyo dhedigga ayaa iyaduna muujinaysa sida loogu baahanyahay in tixgalin gaar ah la siiyo in haweenku ka qaybgalaan hannaanka nabadaynta, lana garwaaqsado caqabadaha gaarka ah ee ay haweenku kala kulmaan deegaannada colaaduhu saameeyeen.

Ugu dambayn, natiijooyinka daraasaddani waxay xoojinayaan muhiimadda ay u dhammaanta iyo ballaarinta kaqaybgalka dhallinyaradu u leeyihiin nabadaynta. Iyada oo awoodaynta dhallinyarada loo marayo waxbarashada, tababarro farsamo-gaccmeed, taageero dhaqaale iyo sida oo kale ka faa'iidaysiga tiknoolojiyadda ayaa lama huraan u ah horumarinta dadaallada kaqaybgalka nabadda. Haddii wax laga qabto caqabadahaas la tilmaamay, lana kobciyo dhaqannada qaddarinaya kaqaybqaadashada dhallinyarada, waxa ay daneeyayaashu Galmudug ka samayn karaan bulsho adkaysi leh oo nabad ku naaloota.

# Talabixinno

Iyada oo laga duulayo natiijooyinka daraasadda, talo-bixinnada soo socda ayaa la soo jeediyay, si loo xoojiyo doorka ay dhallinyaradu ku leedahay kaqaybgalka nabadaynta Galmudug:

1. **Awoodayn Dhaqaale iyo Tababar Xirfadeed:** Waa in dhallinyarada loo sameeyo barnaamijyo lagu taakuleeyo awoodaynta dhaqaale oo ah mid dhammaystiran, kuwaas oo ay ka mid yihiin  taageerooyin maaliyadeed, deeqo iyo tababarro xirfadeed. Barnaamijyadaasi waa in ay xoogga saaraan sidii dhallinyarada loogu gacan siin lahaa in ay furtaan ganacsiyo yar yar, kana qaybqaataan mashaariicda horumarinta bulshada, ayna kaqaybgalaan hindiseyaasha nabadaynta, gaar ahaan dhulalka miyiga ah ee fursaduhu ku yar yihiin. Iyada oo wax laga qabanayo caqabadahan dhaqaale ee daraasaddu tilmaantay, waxaanay barnaamijyadaasi gacan ka geysan karaan sidii meesha looga saari lahaa caqabadaha waa weyn oo kaqaybgalka dhallinyarada hortaagan.

2. **In Dhallinyarada laga Qaybgeliyo Hannaanka Go'aan-gaarista:** Waa in la abuuro isla markaana la hay'adeeyo golayaasha la talinta dhallinyarada ee heer qaran iyo heer dowlad goboleedba, oo ay ku jirto Galmudug, si loo hubiyo in codka dhallinyarada uu qayb ka yahay hababka go'aan-gaarista. Goleyaashaasi waa in ay awood u lahaadaan in ay saamayn ku yeeshaan siyaasadaha iyo maamulka, gaar ahaan arrimaha la xiriira nabadda iyo ammaanka, si loo xaqiijiyo in dhallinyaradu ay kaalin macno leh ku leeyihiin qaabaynta mustaqbalka bulshooyinkooda.

3. **Hindiseyaal Nabadayneed oo Tixgelinaya Haweenka:** Waa in la dejiyaa lana taageeraa barnaamijyo nabad-dhis oo si khaas ah uga jawaabaya caqabadaha u gaarka ah ee ay gabdhaha Galmudug la kulmaan. Taas oo ay ka mid tahay in goobo ammaan ah loo abuuro si ay dumarku uga qaybqaataan wadahadallada iyo go'aan-gaarista, loona siiyo tababarro haweenka u gaar ah oo ku saabsan xallinta khilaafaadka; isla markaana loo hubiyo in dadaallada dhismaha nabaddu yihiin kuwo cadaalad ah oo loo dhan yahay. Hindiseyaashaasi waa in ay sidoo kale la dagaallamaan rabshadaha jinsiga ku salaysan, kaas oo kaqaybgalayaasha daraasadda ee dumarka ahi u calaamadiyeen in uu yahay arrin muhiim ah.

4. **Ballaadhinta Hindiseyaasha Nabadaynta ee Dhulalka Miyiga ah:** Waa in la xoojiyaa lana ballaariyaa gaarsiinta barnaamijyada nabadaynta ee deegaannada miyiga ah, kuwaas oo intooda badan laga fuliyo meelaha xuddunta u ah khilaafaadka/colaadaha. Arrintan waxa lagu gaari karaa in la sameeyo qoondayn dhaqaale, si garab loo siiyo ururrada dhallinyarada reer ee ka hawlgala deegaannada miyiga.  Natiijooyinka daraasaddu waxay xoogga saarayaan muhiimadda ay leedahay in diiradda la saaro deegaannada miyiga ah si wax looga qabto sababaha gundhigga u ah khilaafaadka.

5. **In Tiknoolojiyadda Looga Faa'iideeysto Kaqaybgalka Dhallinyarada:** Waa in madallaha dhijitaalka ah iyo kuwa baraha bulshada loo adeegsadaa si loo xoojiyo kaqaybgalka dhallinyarada ee dadaallada nabad-dhisidda. Kuwaas oo ay ka mid yihiin yagleelidda fagaarayaal khadeed(online) oo lagu doodo, iyada oo la abaabulayo ololeyaal ka fula baraha bulshada oo kor loogu qaadayo wacyiga nabadda iyo dibuheshiisiinta iyo in tabinta sheekooyinka loo adeegsado  dhijitaalka, si loo xoojiyo codka dhallinyarada. Sida ay daraasaddu xustay, tiknoolojiyaddu waxay kaalin mug leh ka ciyaari kartaa tallaabooyinka isbeddelka, iyada oo la gaarayo dad tiro badan, lana dhisayo bulsho xog-ogaal ah oo kaqaybgal samaysa.

6. **Waxkaqabashada Saamaynta al-Shabaab ku Leedahay Dadaallada Nabadaynta:** Waa in la dejiyo xeelado si ammaan ah doodaha nabadaynta dhexdooda looga jawaabayo saamaynta kooxda al-Shabaab, iyada oo aan wax halis ahi soo gaareyn kaqaybgalayaasha. Qodobkan waxaa ku jiri kara in la abuuro deegaan nabad ah oo lagu doodo, in waxbarashada ka-hortagga xagjirnimada iyo barnaamijyada nabadaynta laysku dhafo iyo sidoo kale in la taageero hindiseyaasha ay bulshadu hormuudka u tahay ee layskaga caabbinayo muquuninta al-Shabaab. Daraasaddu waxay muujisay in ay jirto ka labo labayn in si furan looga hadlo kooxda al-Shabaab, taas oo iftiimineysa sida loogu baahan yahay in hab istaratiiji ah oo taxaddar ku dhisan loola falgalo arrintan.

7. **Wacyigelin Dadweyne iyo Isbeddello Dhaqan:** Waa in la bilaabaa ololeyaal wacyigelin dadweyne si loo beddelo aragtiyaha bulsheed eek u aaddan dhallinyarada oo laga oo laga beddelo in loo arko uun dhibbaneyaal ama dhibaato balse ay tahay in loo aqoonsado xubno firfircoon oo isbeddel horseeda. Ololeyaashaasi waa in ay diiradda saaraan kaqaybqaadashada toolmoon ee ay dhallinyaradu ku samayn karaan nabadaynta iyo dibuheshiisiinta, iyagoo la loolamaya caado dhaqameedyada faquuqaya dhallinyarada. Natiijooyinka daraasaddu waxay muujiyeen in horseedidda isbeddel ku dhaca itijaahaadka bulshada uu muhiim yahay si loo abuuro bay'ad dhallinyarada soo dhoweysa kuna garab siisa kaqaybgalka geeddi-socodka nabadda.

Maarso 2025

HERITAGE
INSTITUTE